


**Isdiiwaan Geli Si Aad Codkaada  
Uga Dhiibatid Gobolkaada Adiga  
oo Isticmaalo Tani  
Foomka Boostada iyo Hoggaaminta**



**Muwaadiniinta Mareykanka**

# Tilmaamaha Guud

## Yaa Iisticmaalfi Karo Arjigaan

Haddii aad tahay muwaadin Mareykan oo ku nool ama ciinwaan ku leh gudaha Mareykanka, waxaad isticmaali kartaa arjiga ku qoran buugyaraahaan si:

- Iska diiwaan geli Gobolkaada si aad u dhiibatid codkaada,
- Wuxaan baddalaadda magaca u soo sheegtaa xafiiska diiwaan gelinta cod bixiyaha.
- Marka aad baddashid ciinwaanka, u soo sheeg xafiiska diiwaan gelinta cod bixiyaha, ama
- Iska diiwaan geli xisbi siyaasi.

## Ka Dhaafidda

Fadlan ha isticmaalin arjigaan haddii aad ku nooshahay dibadda Mareykanka iyo dhulalkeeda iyo aadan guri (sharci) ku qabin waddankaan, ama haddii aad ka tirsan tahay ciidamada ku sugar meel ka baxsan guriga. Iisticmaal Arjiga Kaarka Boostada Federaalka (Federal Postcard Application) aad ka heli kartid saldhigya militariga, safaaradaha Mareykanka, ama xafiisyada qunsuliyadaha.

**New Hampshire** - karaaniyada tuulada iyo magaalada waxay qaban doonaan arjigaan, codsi ahaan keliya, xagga foomka diiwaan gelinta warqadaha boostada cod bixiyaha maqan **North Dakota** does ma laha diiwaan gelinta cod bixiyaha. Sharciga **Wyoming** ma ogola diiwaan gelinta warqadaha lagu diro boostada.

## Si Loo Ogaado Haddii aad Xaq u Leedahay in aad is Diiwaan Gelisid si aad Codkaada Uga Dhiibatid Gobolkaada

Gobol kasta wuxuu leeyahay sharcayo u gaar ah oo ku saabsan qofka isdiiwaan gelin karo iyo cod bixinta. Waxaad Tilmaamaha Gobolka ka hubsataa macluumaadka hoos yimaada Gobolkaada. Dhamaan Gobolada waxay u baahan yahii in aad adiga ahaatid muwaadin Mareykan ah, dhallasho ahaan, ama marka aad qaadatid dhallashada Sharciga Federaalka wuxuu sharci darro ka dhigay in been laga sheegto dhallashada Mareykanka si leysu diiwaan geliyo, kaddibna looga dhiibto codka doorashooyinka federaalka, Gobolka, ama deegaanka. **Laguma** diiwaan gelin karo in aad codkaada ka dhiibatid in ka badan hal meel halkii mar.

## Sida loo Buuxiyo Arjigaan

Iisticmaal Tilmaamaha Arjiga iyo Tilmaamaha Gobolka si ay kuu hoggaamiyaan marka aad buuxineysid arjiga.

- Marka kowaad, akhri Tilmaamaha Arjiga. Tilmaamahaan waxay ku siin doonaan macluumaad muhiim ah oo lagu dabaqo qof kasta oo isticmaalo arjigaan.
- Marka xiga, hel Gobolkaada sida hoos timaado Tilmaamaha Gobolka. Iisticmaal tilmaamahaan si aad u buuxisid Sanduuqyada 6, 7, iyo tixraac tilmaamahaan si aad u heshid macluumaad ku saabsan xaq yeelashada cod bixiyaha iyo dhaar kasta oo looga baahan yahay Sanduuqa 9.

## Goorma loo Baahan Yahay in Leys Diiwaan Geliyo si loo Dhiibto Codka

Gobol kasta wuxuu qabsaday taariikhda ugu dambeysyo oo leys diiwaan geliyo si aad codkaada u dhiibatid. Bogga ugu

dambeeyo buugyaraahaan ka hubso taariikhda ugu dambeysyo Gobolkaada.

## Sida Aad u Gudbisid Arjigaada

Waxaad arjigaada u dirtaa ciinwaanka ku qoran meesha ka hooseysyo Gobolkaada gudaha Tilmaamaha Gobolka. Ama, waxaad arjiga qof ahaan geysaa xafiiska diiwaan gelinta cod bixiyaha deegaanka. Gobolada laga rabo in ay ogoladaan foomka qaranka waxay ogolaan doonaan koobiyada arjiga ee laga daabacay sawirka kombuyutarka warqad caadi ah, uu saxiixay arjiilaha, kaddibna lagu diray bakhshad si sax ah loo shabbadeyay.

## Cod Bixiyeyaasha Marka Kowaad ee Iska Diiwaan Geliyay

### Warqadaha Lagu Diro Boostada

Haddii aad iska diiwaan gelineysid xaafadaada marka kowaad aadna direysid arjigaan diiwaan gelinta, sharciga Federaalka wuxuu kaa rabaa in aad marka kowaad muujisid caddeynya aqoonsiga marka kowaad aad codkaada dhiibaneysid. Caddeynya aqoonsiga waxaa ka mid ah:

- Aqoonsi sawir oo iminka jira iyo sax ah ama
- Biilkha Danabka iminka jira, bayaanka bangiga, jeegga dawladda, musharka ama warqadda dawladda ee muujisa magacaada iyo ciinwaanka.

Waxaa dhici karto in cod bixiyeyaasha laga dhaafio shardigaan haddii ay soo gudbiyaan **KOOBIGA** aqoonsigaan soona raaciyaan foomka diiwan gelinta cod bixiyaha. Haddii aad dooneysid in aad soo gudbisid

**KOBI**, fadlan madaxa ku haay waxa soo socdo:

- Waxaa dhici karto in gobolkaada leeyahay sharuudo dheeraad ah oo la xariira aqoonsiga kuwaasoo kaa dalban karo in aad muujisid aqoonsiga marka aad timaadid goobta cod bixinta xattaa haddii aad la ku caddeynya aqoonsiga Federaalka.
- Arjigaan ha soo raacinin warqadaha asalka, **KOOBIYO** keliya.

## Haddii Adiga Lagu Siyyo Arjigaan Wakaaladda Gobolka ama Xafiiska Dadweynaha

Haddii lagu siyyay arjigaan ku jira wakaaladda Gobolka ama xafiiska dadweynaha, waxaad dooran kartaa in aad isticmaashi arjiga. Haddii aad go'aan ku gaartid in aad isticmaashid arjigaan si aad isu diiwaan gelisid kaddibna baxsatid codkaada, waad buuxin kartaa kaddibna waxaad ku dhaafi kartaa wakaaladda Gobolka ama xafiiska dadweynaha. Waa laguu diri doonaa arjiga. Ama, waad qaadan kartaa si aad ugu dirtid ciinwaanka ku qoran meesha ka hooseysyo gobolkaada gudaha Tilmaamaha Gobolka. Sido kale waad qaadan kartaa si aad qof ahaan u geysid xafiiska diiwaan gelinta cod bixiyaha deegaanka.

Xasuusin: Magaca iyo goobta wakaaladda Gobolka ama xafiiska dadweynaha meesha aad ka qaadatay arjiga waxay ahaan doontaa qarsoodi. Kuma muuqan doonto arjigaada. Sido kale, haddii aad go'aan ku gaartid in aad isticmaashid arjigaan si aad isu diiwaan gelisid, go'aankaas wuxuu ahaan doonaa mid qarsoodi ah. Waxay saamayn doontaa adeegga aad ka qaadatid wakaaladda ama xafiiska.

# Tilmaamaha Arjiga

Ka hor inta aadan buuxinin foomka, fadlan ka jawaab su'aalaha ku yaal dhanka kore foomka ee ku saabsan haddii aad adiga tahay muwaadin Mareykan iyo haddii aad jiri doontid 18 sanno Maalinta Doorashada. Haddii aad maya ku jawaabtid mid ka mid ah labada su'aal, ma isticmaali kartid foomkaan si aad isu diiwaan gelisid una dhiibatid codkaada. Has, tilmaamaha u gaarka ah gobolka waxay ku siin karaan maclumaaad dheeraad ah oo ku saabsan xaq u yeelashada diiwaan gelinta si uu qofka codkiisa u dhiibto inta uusan gaarin 18 sanno.

## Sanduuqa 1 - Magaca

Sanduuqaan geli magacaada oo buuxa adiga oo sidaan isugu xijiya - Dambe, Kowaad, Dhexe. Ha isticmaalin naanees ama xarfaha hore magaca.

*Xasuusin:* Haddii arjigaan la xariiro baddalaadda magaca, fadlan noogu sheeg Sanduuqa A (*dhanka hoose foomka*) magacaada uu buuxa ka hor inta aadan baddalin.

## Sanduuqa 2 - Cinwaanka Guriga

Waxaad gudaha sanduuqaan gelisaa cinwaankaada guriga (cinwaanka sharciga). Halkaan **ha** ku qorin cinwaankaada boostada haddii uu ka duwan yahay cinwaankaada guriga. **Ha** isticmaali sanduuqa boostada ama jidka baadiyaha aan lahayn nambarka sanduuqa. Tixraac tilmaamaha u gaarka ah gobolka si aad u heshid sharciyada la xariira isticmaalka nambarada jidka.

*Xasuusin:* Haddii horay laguu geliyay diiwaanka balse tani tahay marka kowaad aad ka diiwaan geleysid cinwaanka Sanduuqa 2, fadlan noogu sheeg **Sanduuqa B** (*dhanka hoose foomrka*) cinwaanka meesha aad horay ka gashay diiwaanka. Fadlan na sii inta ugu badan cinwaanka ilaa inta aad xasusan kartid.

*Sidoo kale Xasuusin:* Haddii aad daggan tahay baadiyaha, aadna lahayn cinwaanka jidka, ama addii aadan lahayn cinwaan, fadlan muuji meesha aad daggan tahay adigoo isticmaala khariidada **Sanduuqa C** (*dhanka hoose foomka*).

## Sanduuqa 3 - Cinwaanka Lagu Diro Warqadaha

Haddii warqadaha boostada laguugu soo diro cinwaan ka duwan cinwaanka Sanduuqa 2, sanduuqaan ku qor cinwaanka laguugu soo diro warqadaha. Haddii aadan cinwaan ku qorin Sanduuqa 2, **waa** in aad cinwaan ku qortid Sanduuqa 3 meel laguugu soo diri karo warqadaha.

## Sanduuqa 4 - Taariikhda Dhallashada

Waxaad sanduuqaan gelisaa taariikhda aad dhallatay adiga isugu xijiya sidaan - Bisha, Maalinta, Sannadka *Ka taxadir in aadan isticmaalin taariikhda maanta!*

## Sanduuqa 5 - Nambarka Telefoonka

Gobolo badan ayaa jira oo ku weydiiya nambarka telefoonkaada haddii ay soo baxaan su'aalo ku saabsan arjigaada. Hase ahatee, waajib kuguma aha in aad buuxisid gudaha sanduuqaan.

## Sanduuqa 6 - Nambarka Aqoonsiga (ID)

Sharciga federaalka wuxuu gobolada ka rabaa in ay nambarka aqoonsiga ka aruuriyaan qof kasta oo isdiwaan geliya. Waa in aad tixraacdiddi tilmaamaha u gaarka ah gobolka xagga qodobka 6 lana xariira maclumaaadka ku saabsan nambarka la ogolaan karo gobolkaada. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama nambarka soshal sekuritiga, fadlan ku muuji foomka kaddibna gobolkaada ayaa ku siin doono nambar.

## Sanduuqa 7 — Xullahada Xisbiga

Gobolada qaar, waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxiinta xisbiga, kooxaha gaarka, shirka balaaran. Si aad u ogaatid haddii Gobolkaada u baahan yahay tani, fiiri qodobka 7 gudaha tilmaamaha hoos yimaada Gobolkaada. Haddii aad dooneysid in aad iska diiwaan gelisid xisbi, waxaad magaca xisbiga aad dooneysid oo buuxa ku qortaa gudaha sanduuqa.

Haddii aadan dooneynin in aad iska diiwaan gelisid xisbi, waxaad ku qortaa "no party" ("maya xisbi") ama baneey sanduuqa. Ha ku qorin "independent" ("madax banaan") haddii aad ula jeedid "no party" ("maya xisbi") maxaa yeelay tani waxay dhallin kartaa in lagu wareero magaca xisbiga siyaasadda Gobolkaada.

*Xasuusin:* Haddii aadan iska diiwaan gelin xisbi, weli waad baxsan kartaa codkaada doorashooyinka guud iyo doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada (aan xisbi raacsaneen).

## Sanduuqa 8 - Isirka ama Kooxda Dhallashada

Tiro yar oo ka mid ah Gobolada ayaa ku weydiya isirkaada ama kooxda aad u dhallatay, si loo fulliyo Sharciga Xuquuqda Cod Bixinta Federaalka (Federal Voting Rights Act). Si aad u ogaatid haddii Gobolkaada weydiisto maclumaaadkaan, fiiri qodobka 8 gudaha tilmaamaha meesha ka hooseyo Gobolkaada. Haddii ay sidaas tahay, waxaad gudaha Sanduuqa 8 gelisaa xullahada laga soo qaado liiska hoose ee sida ugu fiican kuu sharaxda adiga:

- Hindida Mareykanka ama Dhalladka Alaska
- Aasiyaan ama Jasiiradda Basifigga
- Madow, *aan u dhallanin* Hisbanik
- Hisbanik
- Isir-badan
- Caddaan, *ma* aha Hisbanik, asal ahaan
- Wax kale

## Sanduuqa 9 - Saxiixa

Fiiri maclumaaadka ku jira qodobka 9 gudaha tilmaamaha hoos yimaada Gobolkaada. Ka hor inta aadan saxiixin ama aadan calaameynin, hubso in:

- (1) Wuxaad la kullantaa sharuudaha Gobolka, iyo
- (2) Wuxaad fahamsan tahay **dhamaan** Sanduuqa 9.

Ugu dambayn, saxiix magacaada oo buuxa ama calaamee, kaddibna ku qor taariikhda maanta adiga oo isugu xijiya sida soo socoto - Bisha, Maalinta, Sannadka.

Haddii arjiilaha uusan awoodin in uu saxiixo, waxaad

**Sanduuqa D** ku qortaa magaca, cinwaanka, iyo nambarka telefoonka (leyska dhaafi karo) ee qofka kaalmeeyay arjiilaha.

# Arjiga Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha

Ka hor inta aadan dhamaystirin foomkaan, fiiri tilmaamaha Guud, iyo tilmaamaha u gaarka ah Gobolka.

Ma tahay muwaadin u dhashay Mareykanka? Ma jiri <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya doontaa 18 sanno marka la gaaro maalinta cod <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya bixinta ama ka hor?		Booskaan waxaa isticmaali karo xafiiska keliya.				
<b>Haddii aad calaameysid "Maya" si aad uga jawaabtid mid ka mid ah su'aalahaan, ha buuxin foomka.</b> (Fadlan fiiri tilmaamaha u gaarka ah gobolka si aad u ogaatid sharciyada ku saabsan xaq u yeelashada si aad isu diiwaan gelisid ka hor inta aadan gaarin 18 sanno.)						
<b>1</b>	<input type="checkbox"/> Mr. <input type="checkbox"/> Miss <input type="checkbox"/> Mrs. <input type="checkbox"/> Ms.	Magaca Dambe	Magaca Kowaad	Magaca (Magacyada) Dhexe	<input type="checkbox"/> Jr <input type="checkbox"/> II <input type="checkbox"/> Sr <input type="checkbox"/> III <input type="checkbox"/> IV	
<b>2</b>	Cinwaanka Guriga		Abarman ama Dhul #	Magaalada/Tuulada	Gobolka	Zip Code
<b>3</b>	Cinwaanka Meesha Aad Ka Heshid Warqadaha Haddii uu ka Duwan Yahay Kor		Magaalada/Tuulada		Gobolka	Zip Code
<b>4</b>	Taariikhda Dhallashada  Bisha Maalinta Sannadka		<b>5</b> Nambarka Telefoonka (leyska dhaafi karo)	Nambarka Aqoonsiga (ID) - (Fiiri shayga 6 ee ku jira tilmaamaha la xariira gobolkaada)		
<b>7</b>	Xullashada Xisbiga (fiiri qodobka 7 ee ku qoran tilmaamaha loogu talogalay Gobolkaada)		<b>8</b> Isirka ama Kooxda Dhallashada (fiiri qodobka 8 ee ku qoran tilmaamaha loogu talogalay Gobolkaada)			
<b>9</b>	Aniga waa fiiriyay tilmaamaha gobolkeyga, iyo waxaan ku dhaartay/waxaan ku adkeysanaa in: <ul style="list-style-type: none"> <li>■ Aniga waxaan ahay muwaadin Mareykan ah</li> <li>■ Aniga waxaan la kulmaa sharuudaha xaq u yeelashada gobolkeyga iyo waxaan waafaqsanahay dhaar kasta oo loo baahan yahay.</li> <li>■ Macluumaadka aan keenay waa run ilaa inta aan ogsoonahay ee hoos timaada ciqaabta been abuurka. Haddii aan ku buuxiyo macluumaad been abuur ah, waxaa dhici karto in ley ganaaxo, in ley xero, ama (haddii aana ahayn muwaadin Mareykan ah) in leyga dhoofiyoo ama ley diido in aan soo galoo Mareykanka.</li> </ul>					
			Fadlan saxiix magacaada oo buuxa (ama geli calaamad)			
			Taariikhda: <input style="width: 100px; border: 1px solid black;" type="text"/>	Bisha	Maalinta	Sannadka

**Haddii aad isdiiwaan gelisid si aad codkaada u dhiibatid marka kowaad: fadlan tixraac tilmaamaha arjiga si aad u heshid macluumaad ku saabsan sida loo gudbiyo koobiyyada warqadaha aqoonsiga oo shaqeeyaa soona raaci foomkaan.**

## **Fadlan buuxi qeybaha hoose haddii ay ku quseyaan.**

Haddii arjigaan loogu talogalay **baddalaadda magaca**, maxuu ahaa magacaada ka hor inta aadan baddalin?

<b>A</b>	<input type="checkbox"/> Mr. <input type="checkbox"/> Miss <input type="checkbox"/> Mrs. <input type="checkbox"/> Ms.	Magaca Dambe	Magaca Kowaad	Magaca (Magacyada) Dhexe	<input type="checkbox"/> Jr <input type="checkbox"/> II <input type="checkbox"/> Sr <input type="checkbox"/> III <input type="checkbox"/> IV
----------	--	--------------	---------------	--------------------------	--

Haddii aad horay isu diiwaan gelisay balse tani tahay markii ugu horeysay aad iska diiwaan gelisay cinwaanka Sanduuqa 2, maxuu ahaa cinwaankaada meesha aad iska diiwaan gelisay mar hore?

<b>B</b>	Jidka (ama waddada iyo nambarka sanduuqa)	Abarman ama Dhul #	Magaalada/Tuulada/Dagmada	Gobolka	Zip Code
----------	---	--------------------	---------------------------	---------	----------

Haddii aad ku nooshahay miyi, aadan lahayn nambarka jidka, ama haddii aadan lahayn ciwnaan, fadlan khariidada ka muuji meesha aad daggan tahay.

<b>C</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>■ Qor magacayada jidodka isgooya (waddoyinka) u dhaw meesha aad daggana tahay.</li> <li>■ X ku sawir si aad u muujisid meesha aad ku nooshahay.</li> <li>■ Istimmaal dhibic si aad u muujisid dugsiyada, kaniisadaha, ama meelaha kale ee caanka ah meesha aad daggan tahay, iyo qor magaca astaanta caanka.</li> </ul>		<b>WAQOO'</b>
----------	--	--	---------------

<b>C</b>	<u>Tusaale</u>	<u>Waddada #2</u>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Dukaanka Raashinka</li> <li>Woodchuck Road</li> </ul>		
			X		
			Dugsiga Dadweynaha •		

Haddii cod bixiyaha uusan awoodin in uu saxiixo, yaa ku kaalmeeyay arjiilaha in uu buuxiyo arjigisa? Bixi magaca, cinwaanka iyo nambarka telefoonka (waa leyska dhaafi kara nambarka telefoonka).

<b>D</b>					
----------	--	--	--	--	--

**Waxaad arjiga boostada ugu dirtaa cinwaanka la siiyay Gobolkaada.**

# ISTICMAALKA RASMIIGA KELIYA

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---



SI AAD BOOSTADA  
UGU DIRTID  
WAXAAD U  
BAAHAN TAHAY  
SHABADDA  
DARAJADA  
KOWAAD (FIRST  
CLASS STAMP)

---

---

---

---

---

# Arjiga Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha

Ka hor inta aadan dhamaystirin foomkaan, fiiri tilmaamaha Guud, iyo tilmaamaha u gaarka ah Gobolka.

Ma tahay muwaadin u dhashay Mareykanka? Ma jiri <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya doontaa 18 sanno marka la gaaro maalinta cod <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya bixinta ama ka hor?		Booskaan waxaa isticmaali karo xafiiska keliya.				
<b>Haddii aad calaameysid "Maya" si aad uga jawaabtid mid ka mid ah su'aalahaan, ha buuxin foomka.</b> (Fadlan fiiri tilmaamaha u gaarka ah gobolka si aad u ogaatid sharciyada ku saabsan xaq u yeelashada si aad isu diiwaan gelisid ka hor inta aadan gaarin 18 sanno.)						
<b>1</b>	<input type="checkbox"/> Mr. <input type="checkbox"/> Miss <input type="checkbox"/> Mrs. <input type="checkbox"/> Ms.	Magaca Dambe	Magaca Kowaad	Magaca (Magacyada) Dhexe	<input type="checkbox"/> Jr <input type="checkbox"/> II <input type="checkbox"/> Sr <input type="checkbox"/> III <input type="checkbox"/> IV	
<b>2</b>	Cinwaanka Guriga		Abarman ama Dhul #	Magaalada/Tuulada	Gobolka	Zip Code
<b>3</b>	Cinwaanka Meesha Aad Ka Heshid Warqadaha Haddii uu ka Duwan Yahay Kor		Magaalada/Tuulada		Gobolka	Zip Code
<b>4</b>	Taariikhda Dhallashada  Bisha Maalinta Sannadka		<b>5</b> Nambarka Telefoonka (leyska dhaafi karo)	Nambarka Aqoonsiga (ID) - (Fiiri shayga 6 ee ku jira tilmaamaha la xariira gobolkaada)		
<b>7</b>	Xullashada Xisbiga (fiiri qodobka 7 ee ku qoran tilmaamaha loogu talogalay Gobolkaada)		<b>8</b> Isirka ama Kooxda Dhallashada (fiiri qodobka 8 ee ku qoran tilmaamaha loogu talogalay Gobolkaada)			
<b>9</b> Aniga waa fiiriyay tilmaamaha gobolkeyga, iyo waxaan ku dhaartay/waxaan ku adkeysanaa in: <ul style="list-style-type: none"> <li>■ Aniga waxaan ahay muwaadin Mareykan ah</li> <li>■ Aniga waxaan la kulmaa sharuudaha xaq u yeelashada gobolkeyga iyo waxaan waafaqsanahay dhaar kasta oo loo baahan yahay.</li> <li>■ Macluumaadka aan keenay waa run ilaa inta aan ogsoonahay ee hoos timaada ciqaabta been abuurka. Haddii aan ku buuxiyo macluumaad been abuur ah, waxaa dhici karto in ley ganaaxo, in ley xero, ama (haddii aana ahayn muwaadin Mareykan ah) in leyga dhoofiyoo ama ley diido in aan soo galoo Mareykanka.</li> </ul>						
		Fadlan saxiix magacaada oo buuxa (ama geli calaamad)				
		Taariikhda: <input type="text"/> / <input type="text"/> / <input type="text"/> Bisha Maalinta Sannadka				

**Haddii aad isdiiwaan gelisid si aad codkaada u dhiibatid marka kowaad: fadlan tixraac tilmaamaha arjiga si aad u heshid macluumaad ku saabsan sida loo guubiyo koobiyyada warqadaha aqoonsiga oo shaqeeyaa soona raaci foomkaan.**

## **Fadlan buuxi qeybaha hoose haddii ay ku quseyaan.**

Haddii arjigaan loogu talogalay **baddalaadda magaca**, maxuu ahaa magacaada ka hor inta aadan baddalin?

<b>A</b>	<input type="checkbox"/> Mr. <input type="checkbox"/> Miss <input type="checkbox"/> Mrs. <input type="checkbox"/> Ms.	Magaca Dambe	Magaca Kowaad	Magaca (Magacyada) Dhexe	<input type="checkbox"/> Jr <input type="checkbox"/> II <input type="checkbox"/> Sr <input type="checkbox"/> III <input type="checkbox"/> IV
----------	--	--------------	---------------	--------------------------	--

Haddii aad horay isu diiwaan gelisay balse tani tahay markii ugu horeysay aad iska diiwaan gelisay cinwaanka Sanduuqa 2, maxuu ahaa cinwaankaada meesha aad iska diiwaan gelisay mar hore?

<b>B</b>	Jidka (ama waddada iyo nambarka sanduuqa)	Abarman ama Dhul #	Magaalada/Tuulada/Dagmada	Gobolka	Zip Code
----------	---	--------------------	---------------------------	---------	----------

Haddii aad ku nooshahay miyi, aadan lahayn nambarka jidka, ama haddii aadan lahayn ciwnaan, fadlan khariidada ka muuji meesha aad daggan tahay.

<b>C</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>■ Qor magacayada jidodka isgooya (waddooyinka) u dhaw meesha aad daggana tahay.</li> <li>■ X ku sawir si aad u muujisid meesha aad ku nooshahay.</li> <li>■ Istimmaal dhibic si aad u muujisid dugsiyada, kaniisadaha, ama meelaha kale ee caanka ah meesha aad daggan tahay, iyo qor magaca astaanta caanka.</li> </ul>		<b>WAQOO'</b> 
<b>D</b>	Tusaale	Waddada #2	• Dukaanka Raashinka Woodchuck Road  Dugsiga Dadweynaha • <input type="checkbox"/> X

Haddii cod bixiyaha uusan awoodin in uu saxiixo, yaa ku kaalmeeyay arjiilaha in uu buuxiyo arjigisa? Bixi magaca, cinwaanka iyo nambarka telefoonka (waa leyska dhaafi kara nambarka telefoonka).

<b>E</b>					
----------	--	--	--	--	--

**Waxaad arjiga boostada ugu dirtaa cinwaanka la siiyay Gobolkaada.**

# ISTICMAALKA RASMIIGA KELIYA

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---



SI AAD BOOSTADA  
UGU DIRTID  
WAXAAD U  
BAAHAN TAHAY  
SHABADDA  
DARAJADA  
KOWAAD (FIRST  
CLASS STAMP)

---

---

---

---

---

# Tilmaamaha Gobolka

## Alabama

La casriyeyay: 08-31-2018

### Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan

**Gelinta** — Diiwaan gelinta cod bixiyaha waa la xeraa toban iyo afarta maalin ee ka horeyso doorashada. Arjiyada waa in lagu soo diro boostada ama gacanta lagu geeyo maalinta toban iyo shanaad ee ka horeyso doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Haddii aad haysatid hal, waa in aad keentid nambarka shattiga wadaha Alabama ama nambarka kaarka aqoonsiga Alabama. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha Alabama ama kaarka aqoonsiga, waa in aad keentid 4ta nambar ugu dambayso nambarka Soshal Sekuritigaada. Haddii aan lagu siinin nambaradaan, waa in aad ku qortid ereyga "NONE" ("WAXBA") kaddibna waxaa lagu siin doonaa wax laguugu aqoonsado adiga.

**7. Xullahada Xisbiga.** Leyska Dhaafi Karo: Waajib kugu ma aha in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid doorashada musharaxa xisbiga, kullamada, ama shirka guud.

**8. Isirkha ama Kooxda Dhallashada.** Waxaa lagaa rabaa in aad buuxisid gudaha sanduuqaan; hase ahatee, arjigaada lama diid doono haddii aad ku guul dareysatid in aad sidaas samaysid. Fiiri liiska xulashooyinka hoos yimaada

Tilmaamaha Arjiga Sanduuqa 8 (bogga 2).

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Alabama waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- in aad daggan tahay Alabama iyo dagmadaada waqtiga diiwan gelinta
- in aad jirtid 18 sanno ka hor inta aan la gaarin doorasho kasta aan laguugu xakumin dambi culus oo dhalliya anshax darro (ama laguu soo celiyay xuquuqdaada madaniga iyo siyaasadda). Liiska dambiyada culus ee dhalliya anshax darrada waxaa laga heli karaa bogga internetka Xogeyaha Gobolka (Secretary of State): [sos.alabama.gov/mtfelonies](http://sos.alabama.gov/mtfelonies)

• aan iminka laguugu tilmaamin in aad tahay qof itaal darran xagga maskaxda sida uu soo jeediyay dhageysiga isku filnaanta • in aad ku dhaaratid ama xaqiijisid in aad "taageertid iyo difaacdid Dastuurka Mareykanka iyo Gobolka Alabama iyo in aad ka noqotid caqido kasta ama ka tirsanaan koox u dooddha in la afgambyo

dawladda Mareykanka, ama Gobolka Alabama siyaabo sharci darro ah iyo in macluumaadka ku jiro halkaan yahay run, sidaas darteed Ilaah ha i caawino"

### Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Xafiiska Xogeyaha Gobolka  
(Secretary of State)  
P.O. Box 5616  
Montgomery, AL 36103-5616

## Alaska

La casriyeyay: 03-01-2006

### Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan

**Gelinta** - 30 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waa in aad keentid mid ka mid ah nambarada aqoonsiga soo socdo: Shattiga Wadaha Alaska ama Nambarka Kaarka Aqoonsiga Gobolka Alaska. Haddii aadan haysanin Shattiga Wadaha Alaska ama Kaarka Aqoonsiga Gobolka Alaska, waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeeyso Nambarka Soshal Sekuritigaada Haddii aadan haysanin mid ka mid ah nambaradaan aqoonsiga, fadlan waxaad ku qortaa "NONE" ("WAXBA")

- foomka Waxaa lagu siin doonaa nambar gaar ah oo laguugu aqoonsado adiga

**7. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waa in aad keentid mid ka mid ah nambarada aqoonsiga soo socdo: Shattiga Wadaha Alaska ama Nambarka Kaarka Aqoonsiga Gobolka Alaska. Haddii aadan haysanin Shattiga Wadaha Alaska ama Kaarka Aqoonsiga Gobolka Alaska, waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeeyso Nambarka Soshal Sekuritigaada Haddii aadan haysanin mid ka mid ah nambaradaan aqoonsiga, fadlan waxaad ku qortaa "NONE" ("WAXBA" foomka Waxaa lagu siin doonaa nambar gaar ah oo laguugu aqoonsado xagga diiwaan gelinta cod bixiyaha. Macluumaadkaan waa qarsoodi.

In la haysto macluumaadkaan waxay kaalmo u tahay xajinta xogta cod bixiyaha iyo waxay kaalmo u tahay xaqiijinta aqoonsigaada (Cutubka 15 ee Sharciyada Alaska) (Title 15 of the Alaska Statutes).

**Xullahada Xisbiga.** Waajib kuguma aha in aad ka tirsan tahay xisbi marka aad isdiwwaan gelineysid si aad u dhiibatid codkaada. Haddii adiga in aadan dooranin xisbi, waxaa laguu diiwaan gelin doona sida qof aan sheegin meesha uu raacsan yahay.

Alaska waxay leedahay siistemka doorashada musharaxiinta oo xeran. Xisbi siyaasi kasta oo la aqoonsan yahay wuxuu qabaa warqad doorasho oo u gaar ah taasoo soo taxda musharaxiinta ka soo jeedaa xisbigaas siyaasiga. Cod bixiyayaasha u diiwaan gashan sida xubin ka tirsan xisbiga siyaasadda waxaad codkaada siin kartaa xisbigaas oo keliya. Cod bixiyayaasha u diiwaan gashan sida kuwa aan sheegin meesha ay ka tirsan yahiin waxay hal warqad ka dooraan karaan warqadaha la heli karo.

### 8. Isirkha ama Kooxda Dhallashada.

Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Alaska waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- in aad jirtid ugu yaraan 18 sanno muddo 90 maalin gudahooda laga bilaabo diiwaan gelintaa
- in aad daggan tahay Alaska
- in aadan ahayn dambile la xakumay (haddii aan shardi la'an lagu sii deynin)
- in aadan iska diiwaan gelinin in aad codkaada ka dhiibatid Gobol kale

### Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Qeyba Doorashooyinka Gobolka Alaska (Division of Elections State of Alaska)

PO Box 110017  
Juneau, AK 99811-0017

## Arizona

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan**  
**Gelinta** - 29 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada.

### 6. Nambarka Aqoonsiga (ID).

Foomkaada diiwaan gelinta cod bixiyaha oo dhamaystiran waa in laga helo nambarka shattiga wadaha Arizona, ama shattiga aqoonsiga caadiga ee la soo saaro sida waafaqsan A.R.S.

§ 28-3165, haddii shatti uu iminka shaqeeyo iyo yahay mid sax ah. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha Arizona oo iminka shaqeya ama shattiga aqoonsiga aan baabuur lagu wadin, waa in aad

# Tilmaamaha Gobolka

ku soo dartid afarta nambar ugu dambeyso nambarka soshal sekuritigaada haddii lagu siiyay mid. Haddii aadan imink haysanin shattiga wadaha oo shaqeyyo ama shattiga aqoonsiga caadiga ama nambarka Soshal Sekuritiga, fadlan waxaad foomka ku qortaa "NONE" ("WAXBA"). Xogeyaha Gobolka (Secretary of State) ayaa siin doono nambar lagu aqoonsado oo gaar ah.

**7. Xullahada Xisbiga.** Haddii aad iska diiwaan gelisay xisbi siyaasi oo loo aqoonsaday doorashada warqadda, waxaa laguu ogolaan doonaa in aad codkaada ka dhiibatid doorashada warqadda musharaxiinta xisbigaas. Haddii laguu diiwaan geliyay sida qof madax banaan, aysan jirin xisbi aad jeceshahay ama sida xubin ka tirsan xisbi aan loo aqoonsanin warqadda doorashada, waxaad xullan kartaa iyo codkaada ka dhiiban kartaa warqadda dooraashada musharaxiinta mid ka mid ah xisbiyada siyaasadda.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Arizona waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Arizona iyo dagmadaada ugu yaraan 29 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada xigta
- jirtid 18 sanno doorashada guud ee xigta ama ka hor
- aan laguugu xakumin khayaano ama dambi culus (ama aan laguu soo celinin xuquuqdaada madaniga)
- in maxkamadda sharciga aysan kugu tilmaamain in aad tahay qof itaal darran

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Secretary of State/Elections 1700 W. Washington, 7th Floor Phoenix, AZ 85007-2888

## Arkansas

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 30 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Foomka diiwaan gelinta cod bixiyaha oo dhamaystiran waa in laga helo nambarka shattiga wadaha gobolka soo saaray ama nambarka aqoonsiga caadiga. Haddii adiga in aadan haysanin shattiga waddaha ama aqoonsiga aan lagu shaqeyn, waa in aad ku soo dartid

afarta nambar ugu dambeyso sohal sekuritigaada. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama aqoonsi aadan wax ku wadi karin ama nambarka Soshal Sekuritiga, fadlan waxaad foomka ku qortaa "WAXBA" Gobolka ayaa siin doono nambar gaar ah oo lagu aqoonsado.

**7. Xullahada Xisbiga.** Leyska Dhaafi Karo. Waajib kugu ma aha in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid doorashada musharaxa xisbiga, kullamada, ama shirkha guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Arkansas waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
  - in uu ku nool yahay Arkansas, cinwaanka ku jira gudaha Sanduuqa 2 ee arjiga
  - jirtid ugu yaraan 18 sanno doorashada xigta ka hor
  - aan laguugu xakumin dambi culus (ama waa in aad si dhamaystiran u guddatay ciqaabtaada ama in lagu caffiyay)
  - aadan maamul kale ka sheeganin in aad xaq u leedahay in aad ka dhiibatid codkaada
  - aysan jirin maxkamad awood u leh oo kuu garata aad maskax ahaan isku filneen

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Adeegyada Cod Bixiyaha Xogeyaha Adeegyada Gobolka (Secretary of State Voter Services)

P.O. Box 8111  
Little Rock, AR 72203-8111

## California

La casriyeyay: 06-18-2018

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 15 maalin ka hor doorashada; shardiga diiwaan gelinta cod bixiyaha ilaa iyo kana mid ah Maalinta Doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Marka aad isu diiwaan gelineysid in aad codkaada dhiibatid, waa in aad keentid shattigaada wadaha California ama nambarka kaarka aqoonsiga California, haddii aad haysatid mid. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama kaarka aqoonsiga ID, waa in aad keentid

afarta nambar ugu dambeeyso ee Soshal Sekuriti Nambarkaada (SSN). Haddii aadan ku darrin maclumaadkaan, waxaa lagaa rabaa in aad keentid aqoonsi marka aad dhiibaneysid codkaada.

**7. Xullahada Xisbiga.** Haddii aad dooneysid in aad dooratid xisbiga aad jeceshahay, fadlan geli magaca xisbiga siyaasadda. Haddii aadan rabin in aad dooratid xisbiga siyaasadda, waxaad gelisaa "No Party Preference" ("Maya Xisbi Gaar ah") booska lagu siiyay. Sharciga California wuxuu cod bixiyeyaasha doorta "No Party Preference" ("Maya Xisbi Gaar ah") ama doortay xisbi siyaasi aan la sifeyn in ay codkooda ka dhiibtaan doorashada musharaxiinta madaxweynaha xisbi kasta oo ogeysiis u gudbisa Xogeyaha Gobolka (Secretary of State) oo iyaga u ogolaada in ay sidaas sameyaan. Waxaad wici kartaa 1-800-345-VOTE ama booqo

[www.sos.ca.gov](http://www.sos.ca.gov) si aad u ogaatid xisbiyada siyaasadda kuwa ogol cod bixiyeyaasha "No Party Preference" iyo cod bixiyeyaasha kashifay in ay rabitaan u qabaan

xisbi siyaasi aan u qalmin in uu ka

qeybgalo doorashadooda

musharaxiinta madax weynaha.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan geliskd California waa

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay California
- jirtid ugu yaraan 18 ama aad ka weyn tahay Maalinta Doorashada si aad codkaada u dhiibatid
- in aadan iminka ku jirin xabsiga gobolka ama federaalka ama aadan ku sugneen muddada ku meel gaarka xagga xukunka dambiga culus

# Tilmaamaha Gobolka

• aysan maxkamada iminka kuu arkin in aad tahay qof aan isku filneen xagga madaxa  
Waxaa loo baahan yahay saxiixaada. Haddii aad la kullantid sharuudaha leyska rabo ee kor ku qoran, fadlan saxiix kaddibna ku qor taariikhda kaarka diwaan gelinta meesha lagu siiyay.

## Cinwaanka lagu soo diro

**warqadaha:** Qeybta Doorashooyinka Xogeyaha Gobolka (Secretary of State Elections Division)

1500 11th Street, 5th Floor Sacramento, CA 95814

## Colorado

La casriyeyay: 10-16-2018

### Taariikhda Ugu Dambeysyo

Diiwaangelinta — Waxaad iska diiwaan gelin kartaa ilaa, iyo marka la gaaro Maalinta Doorashada (Election Day) Waa in aad isdiiwaan gelisid 8 maalin maalinta doorashada ka hor si laguugu soo diro warqadda cod bixinta. Haddii aad isdiiwaan gelisid in ka yar 8 maalin maalinta doorashada ka hor, waa in aad qof ahaan timaadid dagmadaada si aad u dhiibatid codkaada.

### 6. Nambarka Aqoonsiga (ID).

Foomkaada diiwaan gelinta cod bixiyaha oo dhamaystiran waa in laga helo nambarka shattiga wadaha uu gobolka soo saaray ama nambarka aqoonsiga. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama aqoonsiga gobolka soo saartay, waa in aad ku dartid afarta nambar ugu dambeysyo nambarka soshal securitigaada. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama aqoonsiga gobolka soo saaray ama nambarka soshal securitiga, fadlan waxaad foomka ku qortaa "NONE" ("WAXBA"). Waxaa lagu siin doonaa nambar gaar ah oo laguugu aqoonsado.

7. **Xullashada Xisbiga.** Waxaad iska diiwaan gelin kartaa xisbi. Haddii aad banneysid qeybtaan, ma dhici doonto in laguu diiwaan geliyo xisbi.

8. **Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

9. **Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Colorado waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Colorado ugu yaraan 22 maalin ka hor inta aan la gaarin Doorashada aad ku talo jirtid in aad codkaada ka dhiibatid
- jirtid ugu yaraan 16 sanno, hase ahatee waa in aad jirtid 18 sanno ama aad ka weyn tahay taariikhda doorashada aad dooneysid in aad codkaada ka dhiibatid
- aysan kuu soconin ciqaabta (kana mid ah waqtiga ku meel gaarka) xukunka dambiga culus

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Colorado Secretary of State 1700 Broadway, Suite 200 Denver, Colorado 80290

## Connecticut

La casriyeyay: 09-03-2019

**Taariikhda Ugu Dambeysyo Diiwaan Gelinta** - Lagu diro boostada todobo (7) maalin, doorashada ka hor; lagu diro boostada shan (5) maalin, doorashada musharaxiinta xisbiyada ka hor.

6. **Nambarka Aqoonsiga (ID).** Nambarka Shattiga Waddaha Connecticut, ama haddii aadan haysanin, afarta nambar ugu dambeysyo Nambarkaada Shattiga Wadaha.

7. **Xullashada Xisbiga.** Tani waa leyska dhaafi kara, balse waa in iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxa xisbiga (party primary election), kullamada xisbiga, ama shirka guud.

8. **Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

9. **Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Connecticut, waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Connecticut iyo tuulada aad dooneysid in aad codkaada ka dhiibatid
- jirtid 17 sanno. 17 sanno jirka ee gaari doono 18 sanno Maalinta Doorashada (Election Day) ama ka hor, wuxuu ka qeybgeli karaa doorashada guud ee musharaxa xisbiga.
- dhamaysatay xabsiga iyo xorriyadda ku meel gaarka haddii horay loogu xakumay

dambi culus, iyo Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha kuu soo celiyeen xuquuqdaada cod bixinta

- aysan maxkamadda sharciga kugu tilmaamin in aad tahay qof aan isku filneen xagga cod bixinta

## Cinwaanka lagu soo diro

**warqadaha:** Xogeyaha Gobolka Connecticut (Secretary of the State of Connecticut)

Qeybta Doorashooyinka P.O. Box 150470 Hartford, CT 06115-0470

## Delaware

La casriyeyay: 04-18-2018

**Taariikhda Ugu Dambeysyo Diiwaan Gelinta** - Sabtida 4aad, doorashada musharaxiinta xisbiyada ka hor ama doorashada guud, iyo 10 maalin, doorashada khaaska ka hor.

### 6. Nambarka Aqoonsiga (ID).

Foomka diiwaan gelinta cod bixiyaha oo dhamaystiran waa in laga helo nambarka shattiga wadaha gobolka soo saaray ama nambarka aqoonsiga caadiga. Haddii adiga in aadan haysanin shattiga waddaha ama aqoonsiga aan lagu shaqeynin, waa in aad ku soo dartid afarta nambar ugu dambeysyo sohal sekuritigaada. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama aqoonsi aadan wax ku wadi karin ama nambarka Soshal Sekuritiga, fadlan waxaad foomka ku qortaa "WAXBA" Gobolka ayaa siin doono nambar gaar ah oo lagu aqoonsado.

7. **Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxa xisbiga (party primary election), kullamada xisbiga, ama shirka guud.

8. **Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

9. **Saxiixa.** Waxaad iska diiwaan gelin kartaa Delaware si aad codkaada u dhiibantid haddii:

- in aad tahay muwaadin u dhashay Mareykan, IYO
- in aad daggan tahay Delaware; (Delaware tahay gurigaada), IYO

# Tilmaamaha Gobolka

• aad gaari doontid 18 sanno taariikhda Doorashada Guud ee xigta ama ka hor. Looma baahna in aad iska diiwaan gelisid Delaware haddii aad:

- laguugu tilmaamay in aadan isku filneen xagga madaxa. In qofka lagu tilmaamo in uusan isku filneen waxay tixraacdaa natijada ka soo baxda ilaalinta maxkamadda ama dacwadda la midka ah, sida ku saleysan caddeyn waadix ah iyo qancin in qofka uu qabo itaal darri darran xagga garashada taasoo meesha ka saarta adeegsiga garashada aasaasiga cod bixinta; AMA
- lagu xakumay dambi culus mana dhamaysanin ciqaabtaada, AMA
- laguugu xakumay dambi culus\* mana la caffinin.

\*Liiska Dambiyada Culus ee hor istaga::

- dil ama ula kac ah ama dil aan lagu talogelin, (marka laga reebo dhimishada baabuurka);
- dambi culus kasta oo gaf ah kana soo horjeedo maamulka dadweynaha ee ku lugta leh laaluushka ama saamaynta aan habbooneyn ama ku xadgudubka xafiiska, ama gaf kasta oo la mid ah ee hoos yimaada gobol kasta ama maamul kasta, ama ka tirsan Mareykanka, ama Dagmada Columbia; ama
- dambi culus kasta sida gafka jinsiga, ama gaf la mid ah sida hoos timaado sharciyada gobol kasta ama sharciyada deegaanka ama waddanka Mareykanka ama District of Columbia.

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Gobolka Delaware  
Xafiiska Doorashada  
Guddoomiyaha Gobolka (Office of the State Election Commissioner)  
905 S. Governors Ave., Suite 170  
Dover, DE 19904

## District of Columbia

### La casriyeyay: 11-07-2019

Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta - 21 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada haddii diiwaan gelinta lagu fulliyo boostada, internetka, ama appka telefoonka gacanta, balse cod bixiyaha wuxuu iska diiwaan gelin karaa qof ahaan xilliga doorashada hore iyo Maalinta Doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Sharciga Federaalka wuxuu iminka rabaa in dhamaan arjiyada diiwaan gelinta cod bixiyaha waa in lagu darro nambarka shattiga waddaha arjiilahaama afarta nambar ugu dambeeyo nambarkaada soshal sekuritiga arjiilaha si looga shaqeeyo.

**7. Xullahada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxa xisbiga (party primary election), kullamada xisbiga, ama shirka guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad codkaada uga dhiibatid District of Columbia, waa:

- Tahay muwaadin Mareykan ah
- Daggan tahay District of Columbia
- Daggan tahay District of Columbia ugu yaraan 30 maalin ka hor doorashada aad ku talo jirtid in aad codkaada dhiibatid
- Aadan sheeganin dagganaashada cod bixinta ama xaqaa aad u leedahay in aad codkaada ka dhiibatid gobol kale ama dhul kale oo ku yaal Mareykanka
- Jirtid ugu yaraan 17 sanno (Waad is diiwaan gelin kartaa si aad codkaada u dhiibatid haddii aad jirtid ugu yaraan 16 sanno. Wuxaa dhiiban kartaa codkaada doorashada musharaxinta xisbiyada haddii aad ugu yaraan 17 sanno)

17 sanno jirka, adiga waxaad jiri doontaa ugu yaraan 18 sanno marka la gaaro doorashada guud ee xigta. Waxaad codkaada ka dhiiban kartaa doorashada guud ama doorashada khaaska haddii aad jirtid ugu yaraan 18 sanno).

- Aadan xabsi ugu jirin dambi culus
- Aysan maxkamad kuu arkin in aad sharci ahaan tahay qof aan isku filneen in uu codkiisa dhiibto

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

District of Columbia Board of Elections  
1015 Half Street, SE, Suite 750  
Washington, DC 20003

## Florida

### La casriyeyay: 11-30-2011

Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta - 29 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Haddii aad haysatid mid, waa in aad keentid nambarka shattiga wadaha Florida ama nambarka kaarka aqoonsiga. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha Florida ama kaarka aqoonsiga, waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeeyo nambarka soshal sekuritigaada. Haddii aan lagu siinin nambaradaan, waa in aad ku qortid eraya "NONE" ("WAXBA").

**7. Xullahada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxa xisbiga (party primary election), kullamada xisbiga, ama shirka guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Waxaa lagaa codsanaa, balse waajib kuguma aha, in aad buuxisid sanduuqaan. Fiiri liiska xulashooyinka hoos yimaada Tilmaamaha Arjiga Sanduuqa 8 (Application Instructions for Box 8) (ku yaal bogga 2).

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Florida waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- in aad ahaatid qof sharci ku daggan Gobolka Florida iyo dagmada aad adiga ka raadsaneyid in lagaa diiwaan geliyo
- jirtid 18 sanno (horay ayaad isu diiwaan gelin kartaa haddii aad jirtid ugu yaraan 16 sanno)
- laguugu garanin in aad maskax ahaan tahay qof itaal darran xagga cod bixinta ka jirta Florida ama Gobol kale, ama haddii aad haysatid, waa in aad marka hore laguu soo celiyo xuquuqdaada cod bixinta.
- aan laguugu xakumin dambi culus, ama haddii laguugu xakumay, waa in marka hore laguu soo celiyo xuquuqdaada madaniga haddii lagaa qaaday.
- ku dhaaratid ama xaqiijisid waxa soo socdo:

# Tilmaamaha Gobolka

Aniga waxaan badbaadin doonaa iyo waxaan difaaci doonaa Dastuurka Mareykanka iyo Dastuurka Gobolka Florida (Constitution of the United States and the Constitution of the State of Florida), in aan u qalmo in aan isu diiwaan geliyo sida doorte sida hoos timaado Dastuurka iyo sharciyada Gobolka Florida, iyo in dhamaan macluumaadka ku jira arjigaan in ay run yahiin."

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

State of Florida Department of State Division of Elections The R.A. Gray Building 500 South Bronough St, Rm 316 Tallahassee, Florida 32399-0250

## Georgia

La casriyeyay: 08-15-2013

**Taariikhda Ugu Dambeysyo Diiwaan Gelinta** - Isnuunta shanaad ka hor inta aan la qabanin doorashada musharaxiinta xisbiyada guud, doorashada guud, ama doorashada rabitaanka madax weynaha, ama doorashada khaaska ee sida joogtada ah loo ballamiyo sida waafaqsna Xeerka Doorashada Georgia (Georgia Election Code). Haddii ay dhacdo in doorasho khas ah la ballamiyo taariikh ka duwan taariikhda u qoran Xeerka Doorashada Georgia, diiwaan gelinta waxay dhamaan doontaa maalinta 5aad kaddib marka loo yeero.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Sharciga Federaalka wuxuu kaa rabaa in aad keentid nambarka Shattiga Waddaha GA oo buuxa ama nambarka aqoonsiga (ID) uu soo saaray Gobolka GA. Haddii aadan haysanin shattiga Wadaha GA ama aqoonsiga GA ID, waa in aad keentid 4ta nambar ugu dambeysyo nambarka soshal sekuritigaada. In aad bixisid nambarkaada soshal sekuritiga oo buuxa waa leyska dhaafi kara. Nambarka Soshal Sekuritigaada wuxuu ahaan doonaa qarsoodi, waxaa dhici karto in loo adeegsado marka la barbardhigo xogtra gobolka wakaaladdaha kale xagga aqoonsiga diiwaan gelinta. Haddii aadan lahayn Shattiga Wadaha GA ama nambarka Soshal Sekuritiga, waxaa lagu siin doonaa aqoonsi gaar ah

**7. Xullashada Xisbiga.** Waajib kuguma aha in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid doorashada musharaxa xisbiga, kullamada, ama shirkha guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Waxaa lagaa codsanaa in aad buuxisid gudaha sanduuqaan. Fiiri liiska xulashooyinka hoos yimaada Tilmaamaha Arjiga Sanduuqa 8 (bogga 2).

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Georgia waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- in aad ahaatid qof sharci ku daggan Gobolka Georgia iyo dagmada aad dooneysid in lagaa diiwan geliyo
- jirtid 18 sanno muddo lex bil gudahooda maalinta diiwaan gelinta kaddib, iyo waa in aad jirtid 18 sanno si aad codkaada u dhiibatid
- in aadan ku sugneen xaalad ciqaab bacdamaa laguugu xakumay dambi culus
- aan la go'aaminin in aadan isku filneen maskax ahaan, haddii itaal darrida aan lagaa saarin

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Qeypta Doorashooyinka  
Office of the Secretary of State 2  
Martin Luther King Jr. Drive Suite  
802 Floyd West Tower Atlanta,  
Georgia 30334

## Hawaii

La casriyeyay: 06-18-2018

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 30 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Marka aad isu diiwaan gelisid in aad codkaada dhiibatid, waa in aad keentid shattiga wadaha Hawaii ama nambarka aqoonsiga Gobolka, haddii aad haysatid mid. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama nambarka aqoonsiga ID, waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeysyo Nambarka Soshal Sekuritigaada (SSN).

Haddii aadan haysanin macluumaadkaan, Xafiiska Karaaniga ayaa ku siin doono aqoonsi nambar kuu gaar ah, kaasoo loo adeegsan doono

in laguugu aqoonsado xagga diiwaan gelinta cod bixiyaha.

**7. Xullashada Xisbiga.** Looma baahna "xullashada xisbiga" si loo diiwaan geliyo cod bixiyaha.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Looma baahna macluumaadka isirka ama kooxda dhallashada si loo fulliyo diiwaan gelinta cod bixiyaha.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Hawaii waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Gobolka Hawaii
- jirtid ugu yaraan 16 sanno (waa in aad jirtid 18 sanno maalinta doorashada si aad codkaada u dhiibatid)
- aan laguu xerin dambi culus
- aysan maxkamad kugu xakumin "non compos meritis" ("ma fiyooba")

## Cinwaanka lagu soo

**diro warqadaha:**  
Office of Elections  
State of Hawaii 802  
Lehua Avenue  
Pearl City, HI 96782

## Idaho

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 25 maalin doorashada ka hor.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Geli nambarkaada shattiga wadaha. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha, geli 4ta nambar ugu dambeysyo nambarka soshal sekuritigaada.

**7. Xullashada Xisbiga.** Waajib kugu ma aha in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid doorashada musharaxa xisbiga, kullamada, ama shirkha guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Idaho waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- dagganeed Idaho iyo dagmada muddo 30 maalin ka hor maalinta doorashada

# Tilmaamaha Gobolka

- jirtid ugu yaraan 18 sanno
- aan laguugu xakumin dambi culus, iyo in aan laguu soo celinin xuquuqda dhallashada, ama lagu xerin xukun dambi aad geysatay

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**  
Xogeyaha Gobolka (Secretary of State)  
P.O. Box 83720 State  
Capitol Bldg.  
Boise, ID 83720-0080

## Illinois

La casriyeyay: 09-03-2019

**Taariikhda Ugu Dambeysuo Diiwaan Gelinta** - Diiwaan Gelinta Internetka waxaa la heli karaa ilaa 16 sanno ka hor doorashada iyo diiwaan gelinta qofka waxaa laga heli karaa Maalinta Doorashada (Election Day).  
**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Illinois waxay u baahan tahay Shattiga Wadaha (ama Kaarka Aqoonsiga ID Xogeyaha Gobolka (Secretary of State ID Card) ama 4ta namabar ugu dambeysuo Nambarka Soshal Sekuritigaada. Dadka aan haysanin mid ka mid ah waxyaabahaan, kuwa aan horay iska diiwaan gelinin Illinois, waa in foomka diiwaan gelinta la soo raaciyo koobiga macluumaadka kale ee lagu aqoonsado: waa in aad soo dirtid, adiga oo soo raaciya arjigaan, (i) koobiga aqoontida sawirkha iminka jira, ama (ii) koobiga biilkha danabka iminka la soo dallacay, bayaanka bangiga, jeegga dawladda, jeegga mushaarka, ama warqad kala oo dawladda ka socoto oo muujisa magaca iyo cinwaanka arjiilaha. Haddii aad keenin macluumaadka loo baahan yahay kor, markaas waxaa lagaa rabaa in aad keentid sarakiisha doorashada soona raaciya (i) ama (ii) sida lagu sharaxay kor marka kowaad aad codkaada ka dhiibatid goobta cod bixinta.

**7. Xullashada Xisbiga.** Baneey. Ka dhaafidda: doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada, marka laga reebo marka cod bixiyaha uu rabo in uu codkiisa dhiibto

su'aalahad dadweynaha, waa in la tilmaamo waxa xisbiga jecel yahay.  
**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.  
**9. Saxixa.** Waxaa loo baahan yahay saxixa. Haddii saxixa ka maqan yahay foomka diiwaan gelinta, waa laguu sheegi doonaa in diiwaan gelintaada aysan dhamaystirneen. Si aad isaga diiwaan gelisid Illinois waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Illinois iyo xaafadda aad codkaada ka dhiibaneysid ugu yaraan 30 maalin doorashada xigta ka hor
- jirtid ugu yaraan 18 sanno marka la gaaro ama ka hor Doorashada Guud ee xigta ama Doorashada Leysu Geeyay (Consolidated Election)
- in aadan ku sugneen ciqaabta xabsiga taasoo ka dhallata xukunka dambiga
- aadan sheeganin xaqa aad u leedahay in aad codkaada ka dhiibatid meel kale

**Horay u Diiwaan Gelinta 17 Sanno Jirka.** Illinois waxay diiwaan gelinta qofka jira 17 sanno kaasoo gaari doono 18 sanno marka la gaaro Doorashada Guud ama ka hor (ama Doorashada Leysu Geeyay, sannadka tabanaha doorashada magaalada, tuulada, guddiga dugsiga iyo xafiisyada kale ee ku yaal deegaanka) in isdiiwaan geliyaan kaddibna codkooda ka dhiibtaan Doorashada Guud ee Musharaxiinta Xisbiyada (General Primary) (ama Doorashada Leysu Geeyay ee Musharaxiinta Xisbiyada) oo magacaabi doono musharaxiinta Doorashada Guud ee ku xigta (ama Doorashada Leysu Geeyay).

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**  
Guddiga Doorashooyinka Gobolka  
2329 S. MacArthur Boulevard  
Springfield, IL 62704  
Wararkii Hore

## Indiana

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 29 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada.

## 6. Nambarka Aqoontida (ID).

Nambarkaada aqoontida cod bixiyaha gobolka (ID) waa nambarka shattiga wadaha ay Gobolka soo saartay kana kooban toban nambar. Haddii adiga aadan haysanin shattiga wadaha Indiana, markaas waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeysuo nambarka soshal sekuritigaada. Fadlan tilmaan nambarka la bixiyay. (Koodka Indiana 3-7-13-13)

## 7. Xullashada Xisbiga.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.**  
Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Indiana waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay xaafadda ugu yaraan 30 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada xigta
- jirtid ugu yaraan 18 sanno maalinta la qaban doono doorashada guud ee xigta
- in aadan iminka ku jirin xabsi la xariira dambi laguugu xakumay

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Qeybta Doorashada  
Office of the Secretary of State 302  
West Washington Street, Room E-204  
Indianapolis, IN 46204-2743

## Iowa

La casriyeyay: 10-31-2020

## Taariikhda Ugu Dambeysuo Diiwaan

**Gelinta** - Waa in la geeyo ugu dambayn 5 p.m. 10 maalin ka hor doorashada, haddii ay tahay doorashada guud; 11 maalin ka hor dhamaan inta kale. \*Foomamka diiwaan gelinta ee lagu shabadeyay 15 maalin ka hor doorashada waxaa loo haystaa in ay ku yimaadeen waqtigii loo qabtay xattaa haddii la qabtay taariikhda ugu dambeysuo kaddib.

\*Haddii aad ku guul dareysatid in aad la kullantid taariikhda ugu dambeysuo diiwaan gelinta kore, waxaad iska diiwaan gelin kartaa iyo waxaad codkaada dhiiban kartaa marka aad raaccid tilmaamaha diiwaan gelinta maalinta doorashada. Wuxaan kuwaan ka heli doontaa bogga internetka Xogeyaha Gobolka Iowa:

[https://sos.iowa.gov/  
elections/voterinformation/edr.html](https://sos.iowa.gov/elections/voterinformation/edr.html)

# Tilmaamaha Gobolka

## 6. Nambarka Aqoonsiga (ID).

Nambarkaada aqoonsiga ID waa nambarkaada shattiga wadaha Iowa (ama nambarka aqoonsiga caadiga ee Iowa) haddii aad haysatid mid, haddii kale afarta nambar ugu dambeyso nambarka soshal sekuritigaada. Nambarka aqoonsiga ID aad keentid waxaa laga xaqijjin doonaa Waaxda Gaadiidka Iowa ama Maamulka Sekuritiga Bulshada (Social Security Administration)

**7. Xullashada Xisbiga.** Waxaad horay isaga diiwaan gelin kartaa xisbi, balse waajib kuguma aha, haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxiinta xisbigaas. Waxaad baddali kartaa ama waxaad sheegan kartaa ka tirsanaanta xisbi goobaha cod bixinta maalinta doorashda musharaxiinta xisbiyada.

## 8. Isirka ama Kooxda

**Dhallashada.** Baneey.

## 9. Saxiixa.

Si aad isaga diiwaan gelisid Iowa waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Iowa
- jirtid ugu yaraan 17 sanno; qofka wuu dhiiban karaa codkiisa haddii uu jiri doono 18 sanno maalinta cod bixinta ama ka hor. Marka laga hadlo dorashooyinka musharaxiinta xisbiyada, qofka wuu dhiiban karaa codkiisa haddii uu jiri doono 18 sanno marka la gaaro doorashada caadiga ee u qalanta.
- in aan laguugu xakumin dambi culus ama laguu soo celiyay xuquuqdaada
- aysan maxkamad kugu xakumin aad tahay qof aan "isku filneen in uu codkiisa dhiibto"
- aadan sheeganin xaga aad u leedahay in aad codkaada ka dhiibatid in ka badan hal meel
- ka tanaasushid xaga aad u leedahay in aad codkaada ka dhiibatid meel kale

### Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Qeypta Doorashooyinka  
Xafiiska Xogeyaha Gobolka (Office of the Secretary of State) Lucas Building-Dabaqa 1aad  
321 E. 12th Street  
Des Moines, IA 50319

## Kansas

La casriyeyay: 10-25-2013

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - Lagu diro boostada ama la geeyo 21 maalin, doorashada ka hor

## 6. Nambarka Aqoonsiga (ID).

Foomkaada diiwaan gelinta cod bixiyaha waa in laga helo nambarka shattiga wadaha uu goboka soo saaray ama nambarka kaarka aqoonsiga caadiga. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama kaarka aqoonsiga caadiga, waa in aad ku soo dartid afarta nambar ugu dambeyso nambarka soshal sekuritigaada. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama kaarka aqoonsiga caadiga ama nambarka soshal sekuritiga, fadlan waxaad foomka ku qortaa "NONE" ("WAXBTA"). Gobolka ayaa siin doono nambar gaar ah oo lagu aqoonsado. Namarka aad keentid waxaa loo adeegsan doonaa maamulka keliya mana loo kashifi doono dadweynaha. (KSA 25-2309).

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxa xisbiga (party primary election), kullamada xisbiga, ama shirka guud.

## 8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.

Baneey.

## 9. Saxiixa.

Si aad isaga diiwaan gelisid Kansas waa in:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- in aad daggan tahay Kansas
- in aad jirtid 18 sanno doorashada xigta
- in aad buuxisay qodobada ciqaabta lagu siiyay haddii laguugu helo dambi culus;
- qofka gudanaayo ciqaabta dambi culus xaq uma yeelan doono in uu codkiisa dhiibto
- aadan meel kale ka sheeganin xaga cod bixinta ama aadan sheeganin magac kale
- maxkamad aqoon u leh xukunka aysan kaa reebin cod bixinta

### Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Xogeyaha Gobolka (Secretary of State)  
1st Floor, Memorial Hall  
120 SW 10th Ave.  
Topeka, KS 66612-1594

## Kentucky

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 29 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waxaa loo baahan yahay nambarkaada soshal sekuritigaada oo buuxa. Waxaa loo adeegsadaa ujeedooyinka maamulka keliya mana loo sii daayo dadweynaha (KRS 116.155). Lama ogola in qofna loo diido xaqa uu u leeyahay in la diiwaan geliyo maxaa yeelay wuxuu ku guul dareystay in uu ku soo darro nambarka soshal sekuritiga.

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxa xisbiga (party primary election), kullamada xisbiga, ama shirka guud.

## 8. Isirka ama Kooxda

**Dhallashada.** Baneey.

## 9. Saxiixa.

Si aad isaga diiwaan gelisid Kentucky waa in:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- in aad daggan tahay Kentucky
- in aad daggan tahay dagmada ugu yaraan 28 maalin taariikhda doorashada ka hor
- in aad jirtid 18 sanno marka aad gaartid doorashada guud ee xigta ama ka hor
- aan laguugu xakumin dambi culus ama haddii laguugu xakumay dambi culus, waa in fullinta cafiska kuu soo celisay xuquuqdaada madaniga
- aysan maxkamadda sharciga kugu xakumin in aad "maskax ahaan tahay qof aan isku filneen"
- aadan sheeganin xaga aad u leedahay in aad codkaada ka dhiibatid meelo dibadda ka ah Kentucky

### Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

State Board of Elections 140  
Walnut Street Frankfort, KY  
40601-3240

# Tilmaamaha Gobolka

## Louisiana

La casriyeyay: 02-28-2019

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 30 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waa in aad keentid nambarka shattiga waddaha Louisiana ama nambarka kaarka aqoonsiga gaarka ee Louisiana, haddii la soo saaroi. Haddii aan la soo saarin, waa in aad keentid ugu yaraan afarta nambar ugu dambeeyso soshal sekuritiga nambarkaada.

haddii la soo saaro. Qofkii doonaa wuu bixin karaa nambarka soshal sekuritiga oo buuxa. Haddii waddaha uusan haysanin shattiga waddaha Lousiana, kaarka aqoonsiga gaarka ee Louisiana, ama nambarka Soshal Sekuritiga, arjiilaha wuxuu arjigiisa ku soo dhajin doonaa mid ka mid ah waxyaabaha soo socdo (a) koobiga aqoonsiga sawir oo sax ah; ama (b) koobiga biilka danabka iminka la soo dallacay, bayaanka bangiga, jeegga dawladda, jeegga mushaarka, ama warqad kala oo dawladda ka socoto oo muujisa magaca iyo cinwaanka arjiilaha. Diiwaan geliyaha ama Waaxda Gobolka ma kashifi doonto nambarka soshal sekuritiga cod bixiyaha ku jiro diiwaanka ama ma wareejin karo nambarada soshal sekuritiga cod bixiyeyaasha ku jira diiwaanka liisaska ganacsiga (R.S. 18:104 iyo 154; 42 U.S.C. § 405).

**7. Xullahada Xisbiga.** Haddii aad qorin xisbiga aad raacsan tahay, ma awoodi doonti in aad codkaada ka dhiibatid Doorashada Musharaxiinta Xisbiyada iyo doorashooyinka guddiyada xisbiga. Looma baahna ka tirsanaanta xisbiga siyaasadda xagga doorasho kale.

**8. Isirkha ama Kooxda Dhallashada.** Buuxinta sanduuqaan waa wax leyska dhaafi karo. Fiiri liiska xulashooyinka hoos yimaada Tilmaamaha Arjiga Sanduuqa 8 (Application Instructions for Box 8) (ku yaal bogga 2).

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Louisiana waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Louisiana (Cinwaanka guriga waa in uu ahaado cinwaanka meesha aad sheeganeysid in laguugu siiyo ka-dhaafidda guriga, haddii ay jirto, marka laga reebo dagganaha ku sugar guriga xanaanada ama guriga ciidamada oo dooran kara in ay isticmaalaan guriga xanaanada ama guriga ciidamada ama guriga meesha lagu siiyay ka-dhaafidda guriga. Ardayga kulliyadda wuxuu dooran karaa in uu isticmaalo cinwaanka gurigiisa ama cinwaankiisa inta uu ku maqan yahay dugsiga.)
- jirtid ugu yaraan 17 sanno (jirtid 16 sanno haddii isu diiwaan gelisay arjiga aad ku dalbatay shattiga wadaha Louisiana ama qof ahaan goobta diiwaan geliyah), iyo in aad jirtid 18 sanno ka hor inta aan la gaarin doorashada xigta ee lagu dhiibto codka.
- uusan jirin ammar kugu amra xabsi la xariira dambi culus; ama haddii ama haddii uu ku haysto ammarka noocaas (1) in aan lagu soo xerin taasoo ka damabeeyso ammar soo baxay shantii sanno la soo dhaafay iyo (2)waa in aadan hoos imaanin xabsi la xariira dambi culus oo la xariira khayaano doorasho ama gaf kale oo la xariira doorasho sida waafaqsan R.S. 18:1461.2
- not be under a judgment of full interdiction for mental incompetence or limited interdiction where your right to vote has been suspended

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Xogeyaha Gobolka (Secretary of State)  
Digniin: Qeybta Doorashooyinka  
P.O. Box 94125  
Baton Rouge, LA 70804-9125

## Maine

La casriyeyay: 08-14-2012

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - La geeyay 21 maalin la shaqeeyo doorashada ka hor

(ama cod bixiyaha wuxuu isu diiwaan gelin karaa marka uu yimaado *qof ahaan* ilaa laga gaaro kana mid ah maalinta doorashada).

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waa in aad qortid nambarkaada shattiga aad ku wadidd baabuurtu Maine oo shaqeeyo Haddii aadan haysanin shattiga waddaha Maine, markas waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeeyo Nambarka Soshal Sekuritiga. Cod bixiyeyaasha aan haysanin foomamkaan aqoonsiga ID waa in ay "NONE" ("WAXBA") ku qoraan booskaan.

**7. Xullahada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxiinta xisbiga, kullamada xisbiga, ama shirka guud (haddii xisbiga siyaasadda uusan ogolaanin si kale).

**8. Isirkha ama Kooxda Dhallashada.**  
Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Maine waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Maine iyo xaafadda aad dooneysid in aad codkaada ka dhiibatid
- jirtid ugu yaraan 17 sanno (waa in aad jirtid 18 sanno si aad codkaada u dhiibatid)

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Qeybta Doorashooyinka Xafiiska Shirkadaha (Elections Division Bureau of Corporations), Elections and Commissions 101 State House Station Augusta, ME 04333-0101

## Maryland

La casriyeyay: 06-26-2008

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 9:00

p.m. 21 maalin ka hor inta aan la gelin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Haddii aad haysatid shattiga waddaha Maryland oo shaqeeyaa iminka ama kaarka aqoonsiga Maamulka Baabuurtu Motoorka (Motor Vehicle Administration), waa in aad gelisid shattiga waddaha ama nambarka aqoonsiga. Haddii aadan

# Tilmaamaha Gobolka

haysanin shattiga waddaha Maryland oo iminka dhaqeeyo ama kaarka aqoonsiga Maamulka Baabuurtta Matoorka (Motor Vehicle Administration), waa in aad gelisid ugu yaraan 4ta nambar ugu dsambeysososhal sekuritigaada. Hase ahatee, fadlan xasuuso, kashifaadda nambarkaada soshal sekuritiga oo buuxa waa wax uu qofka iskiisa u ogolaado. Awoodda sharciga u ogolaata saraakiisha doorashada in ay codsadaan nambarkaada soshal sekuritiga oo buuxa waa Qdobka Sharciga Doorashada (Election Law Article), Qeybt 3-202, Soo Koobidda Xeerka Maryland (Annotated Code of Maryland). Nambarka waxaa loo adeegsan doonaa diiwan gelinta keliya iyo ujeedooyinka kale ee laga leeyahay maamulka. Waxay ahaan doontaa qarsoodi.

**7. Xullahada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeybgaadatid doorashada musharaxa xisbiga.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Maryland waa:

- tahay muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Maryland
- jirtid ugu yaraan 18 sanno doorashada guud ee xigta
- in aadan hoos imaanin ilaalin itaal darrida madaxa
- aan laguugu xakumin iihsiga ama iibinta codadka
- aan laguugu xakumin dambi culus, ama haddii taasi ay jirto, in aad dhamaysatay ciqaabta maxkamadda kugu ammartay oo ah xabsi, kana mid ah muuddada ku meel gaarka ama muddada tijaabada xukunka.

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Guddiga Doorashooyinka Gobolka  
P.O. Box 6486  
Annapolis, MD 21401-0486

## Massachusetts

La casriyeyay: 09-03-2019

**Taariikhda Ugu Dambeysos Diiwaan Gelinta** - 20 maalin doorashooyinka ka hor.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Sharciga federaalka wuxuu rabaa in aad keentid nambarka shattiga wadaha si aad isu diiwaan gelisid kaddibna u dhiibatid codkaada. Haddii aadan haysanin shattiga waddaha Massachusetts oo iminka shaqeeyo, markaas waa in aad keentid afarta

(4t) nambar ugu dambeysososhal sekuritigaada Haddii aadan haysanin midna, waa in aad "NONE" ("WAXBA") kaddibna waxaa lagu siin doonaa nambar gaar ah oo laguugu aqoonsado.

**7. Xullahada Xisbiga.** Haddii aadan xisbi ama tilmaan siyaasi ku qorin gudaha sanduuqaan, adiga waxaa diiwaanka laguu gelin doonaa in aadan ku qorneen, taasoo sida caadada tahay loo yaqaan in aad tahay madax banaan. Cod bixiyeyaasha aan la qorin iyo cod bixiyeyaasha ku jira diiwaanka siyaasadda waxay codkooda ka dhiiban karaan doorashada musharaxiinta xisbiyada.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Massachusetts waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Massachusetts
- jirtid ugu yaraan 16 sanno (waa in aad jirtid 16 sanno si aad codkaada u dhiibatid Maalinta Doorashada)
- in aan laguugu xakumin dhaqanka musuqmaasuqa xagga doorashooyinka
- in aadan hoos imaanin ilaalin xagga cod bixinta
- aan iminka lagu xerin xukunka dambi culus

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Secretary of the Commonwealth  
Elections Division, Room 1705 One  
Ashburton Place  
Boston, MA 02108

## Michigan

La casriyeyay: 11-07-2019

**Taariikhda Ugu Dambeysos Diiwaan Gelinta** - Waa in boostada lagu diro ugu yaraan 15 maalin doorashada ka hor; ama qof ahaan la geeyo

karaaniga magaaladaada ama tuuladaada ugu dambayn 8 p.m. Maalinta Doorashada. Haddii aad iska diiwaan gelineysid muddo 14 maalin gudahooda ka hor inta aan la gaarin doorashada, waa in aad bixisid xaqijinta hooyga si loogu ogolaado doorashadaas.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).**

Foomkaada diiwaan gelinta cod bixiyaha oo dhamaystiran waa in laga helo nambarka shattiga wadaha uu gobolka soo saaray ama nambarka kaarka aqoonsiga qofka uu gobolka soo saaray. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama kaarka aqoonsiga qofka uu gobolka soo saaray, waa in aad ku soo dartid afarta nambar ugu dambeeyo ee nambarkaada soshal sekuritiga. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama kaarka aqoonsiga qofka uu gobolka soo saaray ama nambarka Soshal Sekuritiga, fadlan waxaad foomka ku qortaa "WAXBA" ("NONE"). Gobolka ayaa siin doono nambar gaar ah oo lagu aqoonsado.

**7. Xullahada Xisbiga.** Looma baahna "xullahada xisbiga" si loo diiwaan geliyo cod bixiyaha.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Michigan waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- jirtid 18 sanno doorashada xigta
- daggan tahay Michigan iyo ugu yaraan muddo 30 maalin in aad daggan tahay magaaladaada ama tuulada marka la gaaro maalinta doorashada
- in aadan ku xerneen xabsiga kaddib marka lagu xakumo kaddibna lagu siyo ciqaabta

**Ogeysiis** Haddii cod bixiyaha leeyahay shattiga wadaha Michigan (DL) ama aqoonsiga qofka ID (PID), sharciga Michigan wuxuu rabaa in la isticmaalo isla cinwaanka loo adeegsado diiwaan gelinta cod bixiyaha iyo ujeedooyinka DL/PID. Iisticmaalka foomkaan wuxuu kaloo baddali doonaa cinwaankaada DL/PID. Xogeyaha Gobolka (Secretary of State) wuxuu kuu soo diri doonaa stikarka cinwaan cusub Xaad u adeegsatid DL/PID.

# Tilmaamaha Gobolka

## Ciwnaanka lagu soo diro warqadaha:

Waxaad arjigaan oo dhamaystiran boostada ugu dirtaa ama toos ugu geeysa karaaniga magaaladaada ama tuulada. Hel ciwaanka karaaniga magaaladaada ama tuuladaada [Michigan.gov/Vote](http://Michigan.gov/Vote).

Haddii aadan awoodin in aad heshid magaaladaada ama ciwaanka karaaniga tuulada, boostada ugu dir:

Waaxda Xafiiska Doorashooyinka Gobolka Michigan (Michigan Department of State Bureau of Elections)  
P.O. Box 20126  
Lansing, MI 48901-0726

## Minnesota

La casriyeyay: 12-31-2008

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan**  
**Gelinta** - La geeyay ugu dambayn 5:00 p.m. 21 maalin doorashada ka hor (waxaa kaloo jira diiwaan gelinta maalinta doorashada ee laga fullin doono goobaha cod bixinta).

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waxaa lagaa rabaa in aad keentid shattigaada wadaha Minnesota ama nambarka aqoonsiga gobolka ID si laguu diiwaan geliyo kaddibna u dhiibatid codkaada. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha Minnesota ama aqoonsiga gobolka (ID) kaddibna waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeeyso soshal sekuriti nambar Haddii aadan haysanin midna, fadlan waxaad "none" ("waxba") ku qortaa foomka.

**7. Xullahada Xisbiga.** Baneey.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Minnesota waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Minnesota muddo 20 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada xigta
- guri ka daggan tahay ciwaanka ku qoran foomka diiwaan gelinta
- jirtid ugu yaraan 18 sanno maalinta doorashada
- haddii horay laguugu xakumay dambi culus, ciqaabtaada dambiga culus dhacday ama aad dhamaysatay, ama lagaa masaamaxay ciqaabta

- in aadan hoos imaanin ilaalinta maxkamadda-ammartay oo lagaala noqday xaqa aad u leedahay in aad codkaada dhiibatid
- waa in aysan maxkamadda kuu arkin in aad sharci ahaan tahay qof aan isku filneen in uu codkiisa dhiibto.

## Ciwnaanka lagu soo diro warqadaha:

Xogeyaha Gobolka (Secretary of State)  
60 Empire Drive, Suite 100 St.  
Paul, MN 55103-1855

## Mississippi

La casriyeyay: 05-07-2010

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan**  
**Gelinta** - 30 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waxaa lagaa rabaa in aad bixisid nambarka shattiga wadaha iminka jira oo sax ah ama, haddii aadan mid haysanin, afarta nambar ugu dambeeyso soshal sekuritigaada.

**7. Xullahada Xisbiga.** Mississippi ma laha diiwaan gelinta xisbiga. Sidaas darteed, waajib kugu ma aha in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid doorashada musharaxiinta xisbiga, kullamada, ama shirkha guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Mississippi waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- ku nooshahay Mississippi iyo dagmadaada (iyo magaalada, haddii lagu dabaqi karo) 30 maalin ka hor doorashada aad dooneysid in aad codkaada ka dhiibatid
- jirtid 18 sanno doorashada guud aad dooneysid in aad codkaada dhiibatid
- aan laguugu xakumin dil, kufsi, maktab, xattooyo, dab, iska dhigid been ah ku qaadanin lacag ama badeeco, been abuur, khayaano, isdaba maris, boob hubeysan, handadaad, dambi culus oo la xariira jeeg, dambi culus dukaan wax laga xado, dab kicin, qaadashada alaab la soo xadday, dhac, dab kicinta loox, sharci darro lagu qaato baabuur,

kufsiga ilmaha, afduubka baabuurka, ama arooska xaasas badan, ama laguu soo celiyo xuquuqdaada sida sharciga rabo

- in maxkamada aysan kugu tiomaamin in aad maskax ahaan tahay qof aan isku filneen

*Xasuusin:* Sharciga gobolka waxaa lagu baddalay ammarka maxkamadda federaalka sannadkii 1998 iyo sharciga u dagsan gobolka sannadkii 2000. Waa iminka qabanaa foomka sida diiwaan gelinta ka cod bixinta dhamaan xafiisayda gobolka iyo federaalka.

## Ciwnaanka lagu soo diro warqadaha:

Xogeyaha Gobolka (Secretary of State)  
P.O. Box 136  
Jackson, MS 39205-0136

## Ciwaanada xaafadaha deegaanka:

Waxaad kaloo karaaniga wareegga dagmada us soo celin kartaa arjiyada oo dhamaystiran/diiwaan geliyaha meesha aad daggan tahay. Liis dhamaystiran oo ku saabsan karaaniga wareegga dagmada/diiwaan geliyeyaasha waxaa laga heli karaa bogga internetka Mississippi [www.sos.ms.gov](http://www.sos.ms.gov).

La casriyeyay: 09-12-2006

## Missouri

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan**  
**Gelinta** - 28 maalin doorashada ka hor.

## 6. Nambarka Aqoonsiga (ID).

Foomkaada diiwaan gelinta cod bixiyaha oo dhamaystiran waa in laga helo nambarka shattiga wadaha uu gobolka soo saaray. Foomkaada diiwaan gelinta cod bixiyaha oo dhamaystiran waa in sidoo kale laga helo afarta nambar ugu dambeeyso soshal sekuriti nambarkaada. (Qeybta 115.155, RSMo). Haddii aadan haysanin shattiga wadaha ama nambarka soshal sekuritiga, fadlan waxaad foomka kortaa "WAXBA" ("NONE"). Gobolka ayaa siin doono nambar gaar ah oo lagu aqoonsado. Meediya kasta oo elataroonig ah, daabacaadyada ama sumadaha lagu diro warqadaha la bixiyo sida hoos timaado qeybtaan kuma jiraan nambarada telefoonka iyo soshal sekuritiga.

# Tilmaamaha Gobolka

nambarada cod bixiyeyaasha. (Qeybta 115.157, RSMO).

**7. Xullashada Xisbiga.** Waajib kugu ma aha in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid doorashada musharaxa xisbiga, kullamada, ama shirka guud.

**8. Isirkhaama Kooxda Dhallashada.**

Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad codkaada uga dhiibatid Missouri waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Missouri
- jirtid ugu yaraan 17-1/2 sanno (waa in aad jirtid 18 sanno si aad codkaada u dhiibatid)
- in aadan ku jirin muddada tijaabada ama ku meel gaarka kaddib marka laguugu xakumo dambi culus, ilaa ugu dambayn lagaa saaro muddada tijaabadaan ama waqtiga ku meel gaarka
- aan laguugu xakumin dambi culus ama dambi heer dhewe oo la xariira xaqa cod bixinta
- in maxkamadda sharciga aysan kugu tilmaamin in aad tahay qof itaal darran
- aan laguu xayirin sida hoos timaado ciqaabta xabsiga

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Xogeyaha Gobolka (Secretary of State)  
P.O. Box 1767  
Jefferson City, MO 65102-1767

## Montana

La casriyeyay: 11-07-2019

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta - Diiwaan Gelinta Caadiga** (Regular Registration) waxaa la xeraa 30 maalin ka hor doorashada, hase ahatee, weli waad isdiwaan gelin kartaa, waxaad codkaada ka dhiiban kartaa diiwaan gelinti lala soo daahoe ee laga fulliyo xafiiska doorashada dagmada ama goobta loo xil saaro ilaa laga gaaro duhurnimada maalinta ka horeyso doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID Number).** Waa in aad keentid nambarka Shattiga Wadaha Montana (MT), nambarka kaarka Aqoonsiga Montana (ID), ama 4ta nambar ugu dambeeyso Soshal Sekuritigaada (SSN). Haddii aadan awoodin in aad keentid foomamka aqoonsiga la soo dhaafay, waxaad keeni kartaa baasaboorka Mareykanka, kaarka aqoonsiga qabiilka Montana, kaarka Aqoonsiga militariga (ID), ama ruqsadda qaadashada hubka qarsoon marka aad isdiwaan gelisid; ama waxaad soo gudbin kartaa aqoonsiga sawirka, kana mid ah, balse ku ekaan, dugsiga

dagmada ama aqoonsiga sawirka waxbarashada ka dambeyso dugsiga sare adiga oo soo raaciya magaca ku qoran, biilka danabka iminka jira, bayanka bangiga, jeegga lagu qaato mushaarka, jeegga dawladda, ama warqadaha kale dawladda oo muujiya magacaada iyo cinwaankaada iminka jira. \*Si aad u heshid macluumaaad ku saabsan aqoonsiga diiwaan gelinta cod bixiyaha (ID), fadlan booqo <https://sos.mt.gov/voter-id/voter-registration-id-options/>.

**7. Xullashada Xisbiga.** Montana ma rabto iska diiwaan gelinta xisbiga si looga qeybgalo doorashada.

**8. Isirkhaama Kooxda Dhallashada.**

Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Montana waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- jirtid ugu yaraan 18 sanno maalinta doorashada ama ka hor
- daggan tahay Montana iyo dagmada aad dooneysid in aad codkaada ka dhiibatid ugu yaraan muddo 30 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada xigta.
- in aadan ku jirin hay'adda ciqaabta dambi culus oo laguugu xakumay
- aysan maxkamad kuu garanin in madaxa lagaaga jiro
- in aad la kullantid sifooinka ilaa laga gaaro maalinta doorashada xigta haddii aadan iminka la kulmin

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Waxaad foomkaada diiwaan gelinta oo dhamaystiran u dirtaa xafiiska doorashada dagmada.

Macluumaaadka lagala xariiro dagmada waxaa laga heli karaa bogga Xogeyaha Gobolka Montana (Montana Secretary of State): Liiska Guud Sarakiisha Doorashada (Election Officials Master List) ([sosmt.gov](http://sosmt.gov)). Haddii aad dhibaato ku qabtid in aad heshid xafiiska doorashada dagmadaada, la xariir Qeybta Doorashooyinka iyo Adeegyada Cod Bixiyaha ee Xogeyaha Gobolka Montana (Montana Secretary of State Elections and Voter Services Division) si aad u heshid kaalmo, telefoonka (888) 884-8683 ama telefoonka (406) 444-9608, ama emailka [soselections@mt.gov](mailto:soselections@mt.gov). (Xasuusin: Diiwaan gelinta waxaa loo diri karaa xafiiska Xogeyaha Gobolka Montana (Montana Secretary of State), hase ahatee, si leysaga ilaaliyo dib u dhac suurtogal ah, waxaan ku

tallineynaa in aad arjigaada diiwaan gelinta oo dhamaystiran toos ugu dirtid xafiiska doorashooyinka dagmada.)

Xafiiska Xogeyaha Gobolka (Secretary of State's Office)  
P.O. Box 202801 Helena, MT  
59620-2801

## Nebraska

La casriyeyay: 03-08-2018

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta - Jimcaha saddaxaad** (ama la geeyo ugu damabayn 6 p.m. Jimcaha labaad, doorasahada ka hor).

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waa in aad keentid nambarkaada shattiga aad ku waddid baabuurta Nebraska. Haddii aadan haysanin nambarka shattiga wadaha Nebraska, markaas waa in aad qortid afarta nambar ugu dambeeyso soshal sekuritigaada.

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxa xisbiga (party primary election), kullamada xisbiga, ama shirka guud.

**8. Isirkhaama Kooxda Dhallashada.**  
Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Nebraska waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Nebraska
- jirtid ugu yaraan 18 sanno ama in aad jiri doontid 18 sanno marka la gaaro ama ka hor

# Tilmaamaha Gobolka

talaadada kowaad ee ka dambeysuo Isniinta kowaad bisha Nofeembar

- aan laguugu xakumin dambi culus, ama haddii lagu xakumo, in ay ka soo wareegatay ugu yaraan labo sanno kaddib marka aad dhamaysatay ciqaabtaada dambiga culus, kana mid ah muddada ku meel gaarka
- aan rasmii ahaan laguu arkin in aadan isku filneen xagga madaxa

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Nebraska Secretary of State Suite 2300, State Capitol Bldg. Lincoln, NE 68509-4608

## Nevada

La casriyeyay: 05-01-2020

**Taariikhda Ugu Dambeysuo Diiwaan Gelinta - Taariikhda ugu dambeysuo warqadaha la soo diro ama la geeyo qof ahaan si loo diiwaan geliyo waa Talaadada afaraad, doorashada musharaxiinta xisbiyada ka hor ama doorashada guud Tani waa taariikhda la rabo in aad: (1) ku soo dirtid boostaa arjiga cod bixiyaha; ama (2) qofka waa in uu qof ahaan yimaado xafiiska Karaaniga Dagmada/Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyaha. Taariikhda ugu Dambeysuo diiwaan gelinta cod bixiyaha internetka waxaa laga helaa [www.RegisterToVoteNV.gov](http://www.RegisterToVoteNV.gov) waa**

Qamiista ka horeysuo doorashada musharaxiinta xisbiyada ama doorashada guud. Cod bixiyeyaasha loo ogol yahay ee gaffa taariikhda ugu dambeeyso diiwaan gelinta cod bixiyaha waa isdiiwaan gelin karaan si ay qof ahaan codkooda uga dhiibtaan goobta cod bixinta ha ahaato waqtiga cod bixinta hore ama maalinta dooraashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waa in aad keentid nambarka shattiga wadaha Nevada ama nambarka kaarka aqoonsiga ID ee Nevada haddii ay DMV ku siisay mid. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha Nevada oo shaqeeyo ama kaarka aqoonsiga ID Nevada, waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeysuo Soshal Sekuriti Nambarkaada. Haddii aadan haysanin shattiga waddaha baabuurka Nevada oo shaqeeyo ama aqoonsiga Nevada ID

kaarka ama Nambarka Soshal Sekuriti, fadlan la xariir Karaaniga Dagmada/Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyeyaasha la siiyo aqoonsi gaar ah.

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi siyaasi oo weyn haddii aad dooneysid in aad ka qeybgashid doorashooinka musharaxiinta xisbigaas, kullamada, ama shirkha weyn. Haddii aad iska diiwaan gelisid xisbi siyaasi oo yar ama sida qof ahaan xisbi ka tirsaneen, waxaa lagu siin doonaa warqadda cod bixinta qofka ahaan ku jirin xisbi xagga doorashada musharaxiinta xisbiyada.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Nevada waa:

- Ahaatid muwaadin Mareykan ah;
- Gaartay 18 sanno marka la gaaro taariikhda doorashada xigta;
- Si joogto ah u daganeed Gobolka Nevada, dagmadaade, ugu yaraan 30 maalin iyo xaafadaada ugu yaraan 10 maalin ka hor inta aad la gaarin doorashada xigta;
- In aadan iminka ku jirin xabsi la xariira xukunka dambi culus;
- In maxkamadda sharciga aysan kuu arkin in aad tahay qof itaal darran xagga maskaxda; iyo
- Ha sheeganin meel kale in aay tahay meesha aad sharci ahaan daggan tahay.

Horay Isu Diiwaan Gelinta 17 Sanno Jirka - Qofka jira 17 sanno ama ka weyn balse ka yar 18 sanno oo la kulma dhamaan sifooyinka kale in uu codkiisa ka dhiibto Nevada wuxuu horay isu diiwaan gelin karaa in uu codkiisa dhiibto hababka uu heli karo qofka in uu isdiiwaan geliyo. Qofka horay loo diiwaan geliyay in uu codkiisa dhiibto wuxuu toos u noqon doonaa cod bixiye la diiwaan geliyay marka uu gaaro maalinta dhallashada 18aad.

Dambiyada Culus - Qof kasta oo daggan Nevada oo lagu helo dambi waxaa isla markiiba loo soo celin doonaa xaqaa cod bixinta marka

qofka laga sii daayo xabsiga. Ma jiro waqt sugitaan ama talaabo looga baahan yahay in uu qofka qaado. Soo celinta xuquuqda cod bixinta waa toos iyo waa degdeg marka qofka laga sii daayo xabsiga, iyadoo ahaan la fiirinin nooca dambiga culus la geystay ama haddii qofka uu weli ku sugaran yahay xaaladda ku meel gaarka ama muddada tijaabada. Macluumaad badan oo ku saabsan soo celinta xuquuqda cod bixinta waxaa laga heli karaa bogga internetka Xogeyaha Gobolka Nevada (Nevada Secretary of State): [www.nvsos.gov](http://www.nvsos.gov).

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Qeybta Doorashooinka Xogeyaha Gobolka (Secretary of State Elections Division) 101 North Carson Street, Suite 3 Carson City, NV 89701-4786

Arjiyada diiwaan gelinta cod bixiyaha waxaa loo soo celin karaa xafiiska Xogeyaha Gobolka marka lagu soo hagaajijo cinwaanka kore, balse si leysaga ilaaliyo dib u dhaca suurtogalka ah, waxaa laguula tallinnaa in aad arjiigaada diiwaan gelinta cod bixiyaha oo dhamaystiran toos ugu soo celisid xafiiska doorashooinka dagmada.

**Cinwaanada xaafadaha deegaanka:** Si aad ula kullantid taariikhda ugu dambeeyso diiwaan gelinta, khaas ahaan waqtiga labada todobaad ka hor inta aad la gaarin taariikhda ugu dambeeyso diiwaan gelinta cod bixiyaha boostada lagu diro, waa in aad arjiyada diiwaan gelinta cod bixiyaha oo dhamaystiran u soo celisid Karaaniga Dagmada/Diiwaan Geliyaha Cod Bixiyaha. Liis dhamaystiran oo ku saabsan Karaaniga Dagmada iyo Diiwaan Geliyeyaasha Cod Bixiyeyaasha ku qoran bogga internetka Xogeyaha Gobolka Nevada (Nevada Secretary of State): [www.nvsos.gov](http://www.nvsos.gov).

## New Hampshire

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeysuo Diiwaan Gelinta - Tuulada New Hampshire iyo karaaniyada magaalada waxay arjigaan u qaban doonaan sida**

# Tilmaamaha Gobolka

codsiga foomka diiwaan gelinta lagu diro boostada ee cod bixiyaha maqan, loona baahan yahay in uu helo karaaniga magaalada ama tuulada ugu dambayn 10 maalin ka hor doorashada.

Tuulada New Hampshire iyo karaaniyada magaalada waxay arjigaan u qaban doonaa sida codsi ay ku doonaan foomka diiwaan gelinta lagu soo diro boostada ee cod bixiyah maqan. Waxaad u baahan tahay in aad buuxisid Sanduuqa 1 iyo Sanduuqa 2 ama 3.

Arjiga waa in boostada loogu diro tuuladaada ama karaaniga magaalada zip koodkaada. Cinwaanadaan waxay ku qoran yahiin bogga internetka Xogeyaha Gobolka (Secretary of State ee laga helo [www.state.nh.us/sos/clerks.htm](http://www.state.nh.us/sos/clerks.htm))

Waa in la soo diro waqt badan ka hor si tuuladaada ama karaaniga magaalada kuugu soo diraan foomkooda kaddibna aad adiga u soo celisid iyaga ugu dambayn 10 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada.

## New Jersey

La casriyeyay: 03-28-2008

Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta - 21 maalin doorashada ka hor.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waxaa loo baahan yahay afarta nambar ugu dambeeyso ee Nambarka Soshal Sekuritigaada AMA namabrka Shattiga Wadaha New Jersey si loo fulliyo diiwaan gelinta cod bixiyaha. Haddii aadan lahayn midna aqoonsigaan, fadlan waxaad foomka ku qortaa "NONE" ("WAXBA"). Gobolka wuxuu ku siin doonaa nambar oo laguugu aqoonsan doono xagga diiwaan gelinta cod bixiyaha.

**7. Xullashada Xisbiga.** Foomka diiwaan gelinta cod bixiyaha New Jersey ma bixiyo hubinta ka tirsanaanta xisbiga siyaasiga. Cod bixiye cusub oo la giilaan geliyay ama cod bixiye aan weligiis codiisa ka dhiibatin doorashada musharaxiinta xisbiga siyaasadda wuxuu ku dhawaaqi karaa in uu raacsan yahay xisbi goobta cod bixinta maalinta

doorashada musharaxa xisbiga Marka laga hadlo New Jersey, doorashada musharaxiinta xisbiyada waxaa loo qabtaa xisbiyada Dimoqraatiga iyo Republikaanka. Cod bixiyaha wuxuu kaloo soo gudbin karaa foomka baaanka xisbiga siyaasiga si uu u xubin uga noqdo xisbiga siyaasiga. Haddii cod bixiye lagu dhawaaqay uu rabo in uu baddalo xisbiga uu raacsan yahay, isaga ama waa in ay soo gudbiso foomka bayaanka 50 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada musharaxiinta xisbiyada, si ay codkeeda u dhiibato.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.**

Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid New Jersey waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- jirtid ugu yaraan 18 sanno marka la qaban doono doorashada xigta
- daggan tahay Gobolkaan iyo dagmada ciwaankaada ugu yaraan 30 maalin ka hor inta aan la qabanin doorashada xigta
- in aadan ku sugneen gudashada ciqaab ama muddada ku meel gaarka ama tijaabada kaddib marka xukun kugu dhaco oo la xariira gaf laguugu eedeyn karo sida hoos timaado sharciyada gobolkaan ama gobol kale oo ka tirsan Mareykanka.

**Ciwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Waaxda Sharciga iyo Ammaanka Dadweynaha ee New Jersey (New Jersey Department of Law and Public Safety) Division of Elections PO BOX 304 Trenton, NJ 08625-0304

La casriyeyay: 03-01-2006

## New Mexico

Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta - 28 maalin doorashada ka hor.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waxaa loo baahan yahay nambarkaada soshal sekuritigaada oo buuxa. Kaarkaan diiwaan gelinta ee laga helo nambarkaada soshal sekuritiga wuxuu noqon doonaa qeyb ka tirsan xogta diiwaan gelinta cod bixiyaha oo joogto ah lana xariira meesha aad daggan tahay, kuwaasoo u furan fattashaadda dadweynaha gudaha xafiiska karaaniga dagmada. Hase ahatee, nambarkaada

soshal sekuritiga iyo taariikhda dhallashada waxay ahaan doonaan qarsoodi mana loo kashifi doono dadweynaha. Dadweynaha waxay heli karaan liisaska kombuyutarka ku saabsan macluumaadka diiwaan gelinta cod bixiyaha oo kooban (aan lahayn nambarada soshal sekuritiga ama taariikhda dhallashada), waxaa la bixiya marka la cadsado dadka haayo xafiska doorashada, musharaxiinta, xisbiyada siyaasadda, maxkamadaha iyo ururada aan fa'iidata doonin ee horumariya ka-qeybgalka cod bixiyaha iyo diiwaan gelinta, xagga siyaasadda keliya (§1-5-19B, NMSA 1978).

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxa xisbiga (party primary election), kullamada xisbiga, ama shirka guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid New Mexico waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Gobolka New Mexico
- jirtid 18 sanno marka aad gaartid doorashada xigta
- aysan jirin maxkamad kuu diiday xaga aad u leedahay in aad codkaada dhiibatid taasoo ugu wacan itaal darrida madaxa iyo haddii Aniga leygu xakumo dambi culus, aan dhamaystay dhamaan sharuudaha muddada tijaabada ama ku meel gaarka, guttay ciqaabta oo idil ama aan caffis ka helay Guddoomiyaha.

**Ciwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Xafiiska Doorashooyinka  
325 Don Gaspar, Suite 300 Santa Fe,  
NM 87503

## New York

La casriyeyay: 06-19-2014

Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta - 25 maalin doorashada ka hor.

# Tilmaamaha

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Sharciga federaalka wuxuu rabaa in aad keentid nambarka shattiga wadaha si aad isu diiwaan gelisid kaddibna u dhiibatid codkaada.

Haddii aadan haysanin shattiga wadaha, markaas waxaad u baahan tahay in aad keentid ugu yaraan afarta nambar ugu dambeysyo nambarka soshal sekuritigaada. Haddii aadan haysanin midna, fadlan waxaad "NONE" ("WAXBA") ku qortaa foomka.

Gobolkaada ayaa siin doonto nambar lagu aqoonsado oo gaar ah.

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad isku qortid xisbi haddii aad dooneysid in aad codkaada ka dhiibatid doorashada musharaxiinta xisbiga ama shir.

## 8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.

Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid New York waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay dagmada, ama Magaalada New York, ugu yaraan muddo 30 maalin ka hor inta aan la gaarin doorashada.
- jirtid 18 sanno Diseembar 31 sannadka aad soo gudbisid foomkaan (Xasuusin: Waa in aad jirtid 18 sanno marka la gaaro taariikhda doorashada guud, tan xisbiyada, ama doorasho kale aad adiga dooneysid in aad ka dhiibatid codkaada)
- in aadan ku jirin xabsi ama muddada ku meel gaarka la xariira xukunka dambi culus
- aysan jirin maxkamad awood leh oo iminka ammar ku bixisa in aad tahay qof aan isku filneen
- aadan sheegain xaqa aad u leedahay in aad meel kale codkaada ka dhiibatid

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**  
Guddiga Doorashooyinka NYS (NYS Board of Elections)

40 North Pearl Street, Suite 5 Albany, NY 12207-2729

## North Carolina

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeysyo Diiwaan**  
**Gelinta** - Waa in boostada lagu diro 25 maalin ka hor inta aan la qabanin doorashada ama aysan gaarin xafiiska doorashooyinka ama goobta wakaaladda diiwaan gelinta cod bixiyaha ugu dambayn 5:00 p.m. 25 maalin ka hor doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Keen nambarka shattiga wadaha North Carolina, ama nambarka aqoonsiga Baabuurta ID ee Waaxda Baabuurta North Carolina. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha, markaas qor liiska afarta nambar ugu dambeysyo nambarka soshal sekuritigaada.

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi si aad codkaada uga dhiibatid doorashada musharaxiinta xisbigaas haddii xisbigaas uusan ogoleen in cod bixiyeyaasha ka dhiibtaan codkooda doorashada musharaxiinteeda. Haddii aad tilmaantid xisbi siyaasi aan ahayn xisbi u qalma, ama aadan muujinin xisbi, waxaa laguug qori doonaa "Raacsana."

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Waxaa lagaa rabaa in aad buuxisid gudaha sanduuqaan. Hase ahatee, lama diidi doono arjigaada haddii aad ku guul dareysatid in aad sidaas sameysid. Fiiri liiska xulashooyinka hoos yimaada Tilmaamaha Arjiga Sanduuqa 8 (Application Instructions for Box 8) (ku yaal bogga 2).

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid North Carolina waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay North Carolina iyo dagmada aad daggan tahay ugu yaraan muddo 30 maalin oo ka horeyso doorashada
- jirtid 18 sanno maalinta doorashada guud ee xigta
- laguu soo celiyay xuquuqda dhallashada haddii laguugu xakumay dambi culus
- in aadan ku jirin diiwaanka ama aadan codkaada ku dhiibarin dagmo kale ama gobol

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**  
Guddiga Doorashooyinka Gobolka P.O. Box 27255 Raleigh, NC 27611-7255

## North Dakota

La casriyeyay: 03-01-2006

North Dakota ma laha diiwaan gelinta cod bixiyaha.

## Ohio

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeysyo Diiwaan**  
**Gelinta** - 30 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waxaa lagaa codsanaa soshal sekuriti nambarkaada. Bixinta nambarka waa wax uu qofka iskiisa u doorto. Macluumaadkaan waxay u ogolaataa Guddiga Doorashooyinka si loo xaqijiyo diiwaan gelintaada haddii loo baahdo (O.R.C. 3503.14). (Sharciga Federaalka wuxuu rabaa in aad keentid nambarka shattiga wadaha si laguu diiwaan geliyo in aad codkaada dhiibatid. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha, markaas waxaad u baahan tahay in aad keentid ugu yaraan afarta nambar ugu dambeysyo nambarka soshal sekuritigaada. Haddii aadan haysanin mid ka mid ah nambarada, waa in aad foomka ku qortid "NONE" ("WAXBA") kaddibna Gobolka wuxuu ku siin doonaa nambar.)

**7. Xullashada Xisbiga.** Waajib kuguma aha in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxiinta xisbigaas. Waxaa laguu aqoonsan doonaa in aad ka tirsan tahay xisbi marka aad codkaada ka dhiibatid doorashada musharaxiinta xisbiga.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.**  
Baneey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Ohio waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Ohio
- jirtid 18 sanno maalinta doorashada ama ka hor. Haddii aad jiri doontid 18 sanno marka la gaaro ama ka hor maalinta doorashada guud, waxaad codkaada ka dhiibarin kartaa doorashada musharaxiinta xisbiga keliya
- aadan laguugu xakumin dambi culus iyo in aadan iminka ku jirin xabsi
- maxkamada aysan kuu arkin in aad tahay qof aan isku filneen xagga doorashada

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**  
Qeybaa Doorashooyinka Xogeyaha Gobolka Ohio (Secretary of State of Ohio Elections Division)

180 E. Broad Street — 15th Floor Columbus, OH 43215

# Tilmaamaha

## Oklahoma

La casriyeyay: 09-19-2019

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 25 maalin doorashada ka hor.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID Number).** Waa in aad keentid mid nambarka shattiga wadaha Oklahoma oo shaqeeya, nambarka kaarka aqoonsiga gobolka ama afarta nambar ugu dambeeyso Soshal Sekuritigaada.

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeybgaadatid doorashada musharaxa xisbiga. Liis iminka jira oo ku saabsan xisbiyada siyaasadda laga aqoonsan yahay Oklahoma waxaa laga heli karaa bogga internetka Guddiga Doorashada Gobolka Oklahoma (Oklahoma State Election Board) xisbiyada la aqoonsan yahay waxay ogolaan karaan cod bixiyeyasha ku jira diiwaanka aan raacsaneen xisbi in ay ka qeybgaalaan doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada hadba sida xisbiga u garto. Liiska xisbiyada siyaasadda la aqoonsan yahay iyo liiska xisbiyada u ogolada cod bixiyeyasha aan xisbi raacsaneen in ay codkooda ka dhiibtaan doorashada musharaxiinta xisbiyada waxaad ka heli kartaa halkaan:

<https://oklahoma.gov/elections/voter-registration/political-party-info.html>.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneeey.

**9. Saxiixa.** Si aad isu diiwaan gelisid kaddibna codkaada ka dhiibatid Oklahoma waa in aad:

- Waa in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah iyo waa in aad daggan tahay Gobolka Oklahoma.

- Jirtid 18 sanno marka la gaaro taariikhda doorashada xigta ama ka hor. Waxaad isu diiwaan gelin kartaa horay haddii aad jirtid ugu yaraan 17 ½ sanno, hase ahatee lagama shaqeeyn doono diiwaan gelinta cod bixintaada ilaa aad ka gaartid 18 sanno.

- Haddii laguugu xakumo dambi culus, waa in aad si buuxdo u guddatay ciqaabta maalmaha maxkamdda kugu ammarto, kana mid ah muddada aad ku sugaran tahay xabsiga, muddada ku meel gaarka, ama kormeerka, ama aad dhamaysatay muddada tijaabada ay maxkamadda kugu ammartay.

- Waa in aadan hoos imaanin go'aan in aad tahay qof itaal darran, ama qof qeyb ahaan itaal darran qofka laga mamnuucay in uu codkiisa dhiibto.

- Arjiyada waa in uu saxiixo arjiilaha kaddibna ku qoro taariikhda. Saxiixa waa in uu ahaado asal, waa in lagu qoro gacanta ama uu calameeyo arjiilaha. Ma shaqeeyn doonaan faks, dib u soo saarid, OMB Kantarool No. 3265-0015

in lagu qoro makiino ama wax kale oo lagu baddalo saxiixa, saxiixa ama calaamadda qoraha. Waa sharci darro in qof kale loo saxiixo Arjiga Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha Oklahoma (Oklahoma Voter Registration Application).

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**  
Oklahoma State Election Board Box 528800  
Oklahoma City, OK 73152-8800  
Waxaad kaloo internetka ka dhamaystiri kartaa diiwaan gelinta cod bixiyaha, marka la isticmaalo Xariirkha Cod Bixiyaha OK (OK Voter Portal) loona yaqaan "sixiroole":  
<https://okvoterportal.okelections.us/Home/RegWizard>. (Arjiga waa in la daabaco, la saxiixo, kaddibna lagu diro boostada ama gacanta loogu geeyo dagmada ama Guddiga Doorashada Gobolka (State Election Board) si loo dhamaystiro hawsha.)

## Oregon

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 21 maalin doorashada ka hor.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Sharciga federaalka wuxuu rabaa in aad keentid nambarka shattiga wadaha si aad isu diiwaan gelisid kaddibna u dhiibatid codkaada. Haddii aadan hayasanin shattiga wadaha, markaas waxaad u baahan tahay in aad keentid ugu yaraan afarta nambar ugu dambeeyso nambarka soshal sekuritigaada. Haddii aadan hayasanin midna, waxaad u baahan tahay in aad "NONE" ("WAXBA") ku qortid foomka. Gobolkaada ayaa baddal ahaan ku siin doonto nambar aqoonsi gaar ah.

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeybgaadatid doorashada musharaxa xisbiga.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneeey.

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Oregon waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Oregon
- jirtid ugu yaraan 18 sanno maalinta doorashada

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:** Qeybta Doorashooyinka Xogeyaha Gobolka 141 Madaxtooyada Gobolka Salem, OR 97310-0722

## Pennsylvania

La casriyeyay: 05-01-2020

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 15 maalin ka hor doorashada ama xulashada musharaxa xisbiga.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waa in aad keentid Nambarka Shattiga Baabuurka Lagu Wado, haddii aad haysatid mid. Haddii aadan hayasanin

Nambarka Shattiga Wadaha, waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeeyso Soshal Sekuriti Nambarkaada. Haddii aadan hayasanin midna foomka ID, fadlan waxaa "NONE" ("WAXBA") ku qortaa gudaha sanduuqa.

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi weyn haddii aad dooneysid in aad ka qeybqaadatid doorashada musharaxiinta xisbiga.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.**

Waxaa lagaa codsanaa in aad buuxisid gudaha sanduuqaan. Fiiri liiska xulashooyinka hoos yimaada

Tilmaamaha Arjiga Sanduuqa 8 (bogga 2).

**9. Saxiixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Pennsylvania waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah ugu yaraan muddo hal bil ka hor inta aan la gaarin doorashada xigta
- daggan tahay Pennsylvania iyo dagmada doorashada ugu yaraan 30 maalin doorashada ka hor
- jirtid ugu yaraan 18 sanno maalinta la qaban doono doorashada xigta

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Xafiiska Xogeyaha Barwaqaqo Sooranka (Office of the Secretary of the Commonwealth)  
210 North Office Bldg. Harrisburg, PA 17120-0029

Waxaad kaloo iska diiwaan gelin kartaa internetka [register.votespa.com](http://register.votespa.com).

# Tilmaamaha

## Rhode Island

La casriyeyay: 09-03-2019

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan**  
**Gelinta** - 30 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Arjiilaha waxaa laga rabaa in uu keeno shattiga wadaha Rhode Island ama nambarka aqoonsiga Gobolka ID haddii arjiilaha iminka la siiyaya shattiga Rhode Island oo shaqeeya ama aqoonsiga Gobolka ID. Marka la soo qaado kiiska arjiile aan iminka la siinin shattiga wadaha ama aqoonsiga Gobolka ID, waa in uu keeno afarta (4) nambar ugu dambeeyso nambarka soshal sekuritiga. Arjiilaha, aan haysanin midna, waxaa la siin doonaa nambar gaar ah uu ku aqoonsado Gobolka Rhode Island.

**7. Xullahada Xisbiga.** Rhode Island, qofka waa in uu iska diiwaan geliyo xisbi haddii uu rabo in uu ka qeybqaato doorashada musharaxiinta xisbiga. Qofka ku guul dareysta in uu iska diiwaan geliyo xisbi waqtiga diiwaan gelinta wuxuu, haddii ay doortaa, in uu iska diiwaan geliyo xisbi maalinta doorashada musharaxiinta xisbiga kaddibna waxay qeyb ka qaadan doonaan doorashada musharaxiinta xisbiga. Haddii qofka uusan iska diiwaan gelinin xisbi, weli wuxuu codkiisa ka dhiiban karaa doorashooyinka guud iyo doorashooyinka musharaxiinta aan dhinacna raacsaneen.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Rhode Island waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Rhode Island
- jirtid ugu yaraan 16 sanno (waa in aad jirtid 18 sanno si aad codkaada u dhiibatid)
- in aadan iminka ku jirin xabsiga dhaqan celinta taasoo ugu wacan xukunka dambi culus
- aysan maxkamad kugu xakumin in aad tahay qof aan maskax ahaan isku filneen

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**

Guddiga Doorashooyinka Gobolka Rhode Island (Rhode Island State Board of Elections)

50 Branch Ave. Providence, RI

02904-2790

OMB Kantarool No. 3265-0015

## South Carolina

La casriyeyay: 5-1-2021

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan**  
**Gelinta** - 30 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waa in aad keentid ugu yaraan afarta nambar ee soshal sekuritigaada. Waxaad keeni kartaa nambarka soshal sekuritigaada oo buuxa hadii aad doontid. Nambarka Soshal Sekuritiga ma ka muuqan doono warbixin kasta uu soo saaro Guddiga Doorashada Gobolka, marna la siin doono qof aan loo fasixin. (South Carolina Cutubka 7-5-170)

**7. Xullahada Xisbiga.** Waajib kugu ma aha in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid doorashada musharaxa xisbiga, kullamada, ama shirk guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Waxaa lagaa rabaa in aad buuxisid gudaha sanduuqaan. Waxaa dhici karto in la soo diido arjigaada haddii aad ku guul dareysatid in aad sidaas sameysid. Fiiri liiska xulashooyinka hoos yimaada Tilmaamaha Arjiga Sanduuqa 8 (Application Instructions for Box 8) (ku yaal bogga 2).

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid South Carolina waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- jirtid ugu yaraan 18 sanno maalinta doorashada xigta ama ka hor
- daggan tahay South Carolina, dagmadaada iyo xaafadda
- aadan ku xernaanin xabsiga dadweynaha taasoo ka dhallata xukun dambi
- aan marna laguugu xakumin dambi culus ama gaf ka soo horjeedo sharciyada doorashada, ama haddii horay laguu xakumay, aad guddatay ciqaabta oo idil, kana mid ah muddada tijaabada ama muddada ku meel gaarka, ama lagaa caffiyay xukunka
- in aadan hoos imaanin ammar ka soo baxay maxkamadda oo kugu tilmaama in aadan maskax ahaan isku filneen
- sheegatid in cinwaanka ku qoran arjiga yahay meesha keliya aad sharci ahaan daggan tahay iyo in aadan sheeganin meel kale in aad daggan tahay

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**  
Guddiga Doorashada Gobolka (State Election Commission)  
P.O. Box 5987  
Columbia, SC 29250-5987

## South Dakota

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan**  
**Gelinta** - La gaarsiiyay 15 maalin, doorashada ka hor.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waxaa lagaa codsanaa shattiga aad baabuurka ku waddid. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha oo shaqeeyo, waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeeyo soshal sekuritigaada.

**7. Xullahada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxa xisbiga (party primary election), kullamada xisbiga, ama shirk guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid South Dakota waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay South Dakota
- jirtid 18 sanno doorashada xigta
- in aadan iminka guddanin ciqaab culus kana mid ah xabsi, aad guddatay ama lagaa joojiyay, sida siistemka xabsiga qaangaarka
- aysan jirin maxkamad kugu xakuntay in aad tahay qof maskax ahaan aan isku filneen

# Tilmaamaha

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Elections, Secretary of State 500  
E. Capitol  
Pierre, SD 57501-5070

## Tennessee

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 30 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waxaa loo baahan yahay nambarkaada soshal sekuritigaada oo buuxa. Waxaa loo baahan yahay nambarka Soshal Sekuritiga, haddii aad haysatid, xagga aqoonsiga iyo si looga hortago in qofka uusan meel kale iska diiwaan gelinin ((TCA 2.2.116)).

**7. Xullahada Xisbiga.** Waajib kugu ma aha in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid doorashada musharaxa xisbiga, kullamada, ama shirka guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.**  
Leyska Dhaafi Karo.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Tennessee waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Tennessee
- jirtid ugu yaraan 18 sanno maalinta doorashada xigta ama ka hor
- aan laguugu xakumin dambi culus, hase ahatee haddii laguugu xakumay, xaq u yeelashadaada in aad isdiwaan gelisid kaddibna dhiibatid codkaada waxay ku xeran tahay dambiga laguugu xakumay iyo taariikhda xukunka dhacay. Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan hawshaan, wac 877-850-4959 ama booqo [https://sos.tn.gov/\\_restoration](https://sos.tn.gov/_restoration). Haddii xukunka kugu dhacay adiga meesha laga saaray,
- ma laguu qaadan doono in uu kugu dhacay xukun dambi culus
- maxkamadda awoodda iyo kartid leh ma kugu tilmaami doono in aad tahay qof aan isku filneen (ama laguu soo celiyay awoodda sharciga)

Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:  
Coordinator of Elections Tennessee Tower,  
Seventh Floor 312 Rosa L. Parks Ave.  
Nashville, TN 37243-1102

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Coordinator of Elections Tennessee  
Tower, Seventh Floor 312 Rosa L.  
Parks Ave.  
Nashville, TN 37243-1102

## Texas

La casriyeyay: 03-01-2006

**Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan Gelinta** - 30 maalin ka hor intaa aan la gaarin doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waa in aad keentid nambarka shattigaada wadaha si aad isu diiwaan gelisid una dhiibatid codkaada. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha, markaas waxaad u baahan tahay in aad keentid ugu yaraan afarta nambar ugu dambeeyso nambarka soshal sekuritigaada. Haddii aadan haysanin midna, fadlan waxaad "NONE" ("WAXBA") ku qortaa foomka. Gobolkaada ayaa baddal ahaan ku siin doonto nambar aqoonsi gaar ah.

**7. Xullahada Xisbiga.** Waajib kugu ma aha in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad ka qeyb qaadatid doorashada musharaxa xisbiga, kullamada, ama shirka guud.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.**  
Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Texas waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay dagmada laga gudbiyyay arjiga diiwaan gelinta
- jirtid ugu yaraan 17 sanno iyo 10 bil (waa in aad jirtid 18 sanno si aad codkaada u dhiibatid)
- aan ugu dambayntii laguugu xakumin dambi culus, ama haddii aad tahay dambiile culus, waa in si buuxdo u guddatay ciqaabtaada, kana mid ah, haddii ay jirto, xabsi, muddada ku meel gaarka, kormeer, muddada tijaabada ama lagu caffiyo.
- maxkamadda sharciga aysan si kama dambays ah kugu tilmaamin in aadan isku filneen

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Qeybta Doorashooyinka Xafiiska Xogeyaha Gobolka (Office of the Secretary of State Elections Division) P.O. Box 12060 Austin, TX 78711-2060

## Utah

La casriyeyay: 09-19-2019

**Taariikhda Ugu Dambayso Diiwaan Gelinta** -

Taariikhda ugu dambeeyso waa kala duwan tahay:

- **Boostada:** foomamka diiwaan gelinta waa in lagu soo diro boostada ama loo soo diro si kale loo calaameyay sida Xafiiska Boostada u qabtay muddo 30 maalin ka hor doorashada.
- **Qof Ahaan:** foomamka diiwaan gelinta waxaa la keeni karaa xafiiska karaaniga dagmada 7 maalin ka hor doorashada.
- **Internetka:** diiwaan gelinta waa in la gudbiyo 7 maalin ka hor doorashada. Wuxuu u baahan yahay shattiga baabuurtla lagu wado Utah ama aqoonsiga Utah (ID) oo shaqeeyo.
- **Isla Maalinta:** cod bixiyeyasha waxay iska diiwaan gelin karaan goobaha cod bixinta waqtiga cod bixinta hore ama Maalinta Doorashada marka la soo gudbiyo warqadda cod bixinta ku meel gaarka.
- 6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Foomkaada diiwaan gelinta oo dhamaystiran waa in laga helo mid ka mid ah kuwa soo socdo: nambarka Shattiga Wadaha Utah, nambarka Aqoonsiga Gobolka Utah, ama afarta nambar ugu dambeeyso nambarla Soshal Sekuritigaada. Haddii aadan haysanin Shattiga Wadaha Utah ama kaarka Aqoonsiga Gobolka Utah, fadlan waxaad "None" ("Waxba") ku qortaa gudaha meesha loogu talogalay kaddibna ku buuxi afarta nambar ugu dambeeyso nambarka Soshal Sekuritigaada.
- 7. Xullahada Xisbiga.** Looma baahna ku dhawaqaidda xisbi si aad isu diiwaan gelisid una dhiibatid codkaada. Hase ahatee, sharciga doorashada Utah wuxuu xisbi siyaasi kasta u ogol yahay in uu doorto qofka uu u ogolaan doono in uu codkiisa ka dhiibto doorashada musharaxiinta xibiyada. Haddii aadan ka tirsaneen xisbi,

# Tilmaamaha

waxaa dhici karto in lagaa reebo in aad codkaada ka dhiibatid doorashada musharaxiinta xisbiyada.

## 8. Isirka ama Kooxda Dhallashada. Baneey.

### 9. Saxixa. Si aad isaga diiwaan gelisid Utah, waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- dagganeyd Utah muddo 30 maalin, ka hor inta aan la gaarin doorashada xigta
- jirtid ugu yaraan 18 sanno maalinta doorashada xigta ama ka hor (dadka jira 16 sanno iyo 17 sanno waxay horay isu diiwaan gelin karaan si ay codkooda u dhiibtaan haddii qofka jira 17 sanno uu gaari doono 18 sanno marka la gaaro ama ka hor doorashada guud ee soo socoto, waxay isu diiwaan gelin karaan horay xagga doorashooyinka musharaxiinta)
- in aad ahaatid qof aan gelin dambi culus oo iminka loo xeray dambi culus
- in aad ahaatid qof aan gelin khayaano qaran ama dambi ka soo horjeedo doorashada, haddii aan laguu soo celinin xuquuqda madaniga
- in aad ahaatid qof aysan maxkamadda sharciga ku tilmaamin in aad maskax ahaan tahay qof aan isku filneen
- iminka daggan tahay gudaha dagmada cod bixinta ama xaafadda aad iska diiwaan gelisay in aad codkaada ka dhiibatid

**Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:**  
Xafiiska Ku Xigeenka Guddoomiyaha Gobolka (Office of the Lieutenant Governor)  
P.O. Box 142325  
Salt Lake City, UT 84114

## Vermont

La casriyeyay: 09-19-2019

**Taariikhda Ugu Dambeysyo Diiwaan Gelinta -** Diiwaan gelinta lagu soo diro boostada waa in la gaarsiyo xafiiska karaaniga maalinta ugu dambeysyo uu karaaniga has, saacado ka hor doorashada. Vermont waxay leedahay diiwaan gelinta cod bixiyaha maalinta Doorashada oo lagu qabto goobaha cod bixinta sida diiwaan gelinta cod bixiyaha internetka. Si aad isaga diiwaan gelisid internetka, booqo – <https://olvr.sec.state.vt.us>.

## 6. Nambarka Aqoonsiga (ID). Waa in aad bixisid nambarkaada shattiga Wadaha Vermont, ama haddii aadan lahayn, 4ta nambar ugu dambeysyo nambarka Soshal Sekuritigaada.

Haddii aada haysanin shattiga Wadaha Vermontha ama nambarka Soshal Sekuritiga, fadlan waxaad foomka ku qortaa "WAXBA." Xafiiska Xogeyaha Gobolka (Secretary of State's office) wuxuu ku siin doonaa nambar gaar ah oo laguugu aqoonsado.

### 7. Xullashada Xisbiga. Vermont ma u baahna diiwaan gelinta xisbiga si looga qeybgalo doorasho kasta.

#### 8. Isirka ama Kooxda Dhallashada. Looma baahna.

### 9. Saxixa. Si aad isaga diiwaan gelisid Vermont, waa

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Vermont
- jirtid 18 sanno maalinta doorashada ama ka hor
- qaadatay Dhaarta soo socoto Wuxaad si dhab ugu dhaarataay (ama xaqijisay) in mar kasta aad dhiibaneysid codkaada ama cod bixinta, adiga oo taabanaaya shay kasta oo quseeya gobolka Vermont, wuxaad sidaas u samayn doontaa sida garashadaada ku siiso taasoo ku horseedi doonta tallada ugu fiican wanaagsan lana mid ah, sida ku qoran Dastuurka, cabsi la'aan ama eex la'aan [Dhaarta Cod Bixiyaha, Dastuurka Vermont, Chapter II, Qeybta 42] Marka aad saxiixdid gudaha Sanduuqa 9, wuxaad ogsoon tahay in lagu dhaariyay ama waxaad qaadatay dhaarta cod bixiyaha Vermont sida ku daabacan kor.

#### Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Qeybta Doorashooyinka Xafiiska Xogeyaha Gobolka (Office of the Secretary of State Elections Division)

128 State Street

Montpelier, VT 05633-1101

## Virginia

La casriyeyay: 09-19-2019

**Taariikhda Ugu Dambeysyo Diiwaan Gelinta -** Arjiiga waa in la geeyo ama lagu diro boostada 22 maalin ka hor inta aan la qabanin doorashada.

## 6. Nambarka Aqoonsiga (ID). Waxaa loo baahan yahay nambarkaada soshal sekuritigaada oo buuxa. Nambarka Soshal Sekuritigaada wuxuu ka muuqan doonaa warbixinta ay diiwaan gelinta cod bixinta iyo sarakiisha cod bixinta iyo, xagga xullahada guddiyada, maxkamadaha, u soo saareen isticmaalka rasmiga keliya. Qodobka II, §2, Dastuurka Virginia (1971).

### 7. Xullashada Xisbiga. Baneey.

#### 8. Isirka ama Kooxda Dhallashada. Baneey.

### 9. Saxixa. Si aad isaga diiwaan gelisid Virginia waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Virginia iyo xaafadda aad dooneysid in aad codkaada ka dhiibatid
- jirtid 18 sanno doorashada guud ee xigta bisha Maajo ama Nofeembar
- aadan laguugu xakumin dambi culus, ama aadan ahayn qof loo soo celiyaya xuquuqda madaniga
- aysan iminka maxkamadda sharciga kugu tilmaamin in aad tahay qof aan isku filneen xagga madaxa

#### Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Virginia State Board of Elections 1100 Bank Street, 1st floor Richmond, VA 23219

## Washington

La casriyeyay: 09-19-2019

**Taariikhda Ugu Dambeysyo Diiwaan Gelinta -** foomamka internetka iyo warqadaha boostada waa in la gaarsiyo sarkaalka doorashooyinka ugu dambayn 8 maalin doorashada ka hor. Qof ahaan isu diiwaan geli

# Tilmaamaha Gobolka

waqtii kasta saacadaha la shaqeeyo iyo 8:00 p.m. ka hor Maalinta Doorashada.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Waa in aad keentid shattigaada wadaha Washington ama nambarka kaarkaada aqoonsiga (ID). Haddii aadan haysanin shattiga baabuurka lagu wado ee Washington ama Kaarka Aqoonsiga ID, waa in aad keentid afarta nambar ugu dambeysyo Nambarka Soshal Sekuritigaada. In aan la bixinin macluumaadkaan waxay hor istaagi kartaa in aan laga shaqeynii diiwaan gelintaada.

**7. Xullashada Xisbiga.** Lagaama rabo in aad tilmaantid xisbiga aad raacsan tahay si aad isaga diiwaan gelisid Washington.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Washington waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- in aad ahaatid qof sharci ku daggan Gobolka Washington, dagmadaada iyo xaa faddaada mudd 30 maalin ka hor inta aan la qabanin doorashada aad dooneysid in aad codkaada ka dhiibatid
- jirtid ugu yaraan 18 sanno Maalinta Doorashada
- in aadan hoos imaanin kormeerka Waaxda Dhaqan Celinta (Department of Correction) xagga xukunka dambiga culus ee Washington
- 16 iyo 17 sanno jirka waxay isugu qori karaan sida Cod Bixiyeyaaasha Mustaqbalka iyo in ay toos isu diiwaan gelyaan si ay codkooda u dhiibtaan marka ay gaaraan 18 sanno

## Cinwaanka lagu soo diro

**warqadaha:** Qeybaa  
Doorashooyinka Xogeyaha  
Gobolka (Secretary of State  
Elections Division)  
P.O. Box 40229  
Olympia, WA 98504-0229

afarta nambar ugu dambeysyo nambarka soshal sekuritigaada. Haddii aadan haysanin nambarka shattiga wadaha ama nambarka soshal sekuritiga, waxaa lagu siin doonaa nambar laguugu aqoonsado.

**7. Xullashada Xisbiga.** Waa in aad iska diiwaan gelisid xisbi haddii aad dooneysid in aad qeyb ka qaadatid doorashada musharaxa xisbiga (party primary election), kullamada xisbiga, ama shirka guud (haddii aadan codsanin warqadda cod bixinta xisbiga oo u ogolaata dadka madax banaan in ay dhiibtaan codkooda)

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Baneey.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid West Virginia waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- ku nooshahay West Virginia, cinwaanka kore
- jirtid 18 sanno, ama si aad codkaada uga dhiibatid musharaxiinta waa in aad jirtid 17 sanno una gudbeysid 18 sanno ka hor inta aan la gaarin doorashada guud
- in aadan hoos imaanin xukun, tijaabo, ama ku meel gaar, khayaano qaran ama laaluushka doorashada
- aysan maxkamadda awoddha u leh aysan kugu xakumin in aad tahay qof aan "maskax ahaan isku filneen"

## Cinwaanka lagu soo diro

**warqadaha:** Secretary of State  
Building 1, Suite 157-K  
1900 Kanawha Blvd. East  
Charleston, WV 25305-0770

## Wisconsin

La casriyeyay: 08-31-2018

### Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan

Gelinta - Waa in lagu diro boostada ugu yaraan 20 maalin doorashada ka hor; ama lagu dhamaystiro xafiiska tuulada, buulada, ama karaaniga magaalada ilaa 5:00 p.m. ama maalinta Jimcaha ee ka horeyo doorashada; ama lagu dhamaystiro goobta cod bixinta Maalinta Doorashada. **Wisconsin waxay kaloo ogoshahay in cod bixiyaha iska diiwaan geliyo internetka** – Booqo <https://myvote.wi.gov> ilaa 20 maalmood ka hor doorashada haddii cod bixiyaha

uu iminka haysto shattiga wadaha Wisconsin oo shaqeeyo ama kaarka gobolka ID soo saaro.

**2. Cinwaanka Guriga.** Foomkaada diiwaan gelinta cod bixiyaha, waxaad soo raacisa warqadda caddeyn ta dagganaha iyo magacaada kowaad iyo dambe iyo cinwaanka meesha aad daggan tahay, sida koobiga shattiga wadaha Wisconsin oo iminka shaqeeyo ama kaarka gobolka ID, biilkha canshuurta hantida maguuraanka, biilkha danabka aan ka badneen 90 maalin, bayaanka bangiga, jeegga mushaarka ama dabada jeegga, ama jeeg ama warqada ay soo saartay qeyb ka tirsan dawladda. Liis buuxa waxaa laga heli karaa <http://elections.wi.gov>.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Keen shattiga wadaha Wisconsin aan welii dhicin ama nambarka kaarka DOT-soo saartay ID. Haddii aadan haysanin shattiga wadaha DOT-soo saartay oo iminka shaqeeyo ama kaarka ID, waxaad keentaa afarta nambar ugu dambeysyo nambarka soshal sekuritiga.

**7. Xullashada Xisbiga.** Looma baahna.

**8. Isirka ama Kooxda Dhallashada.** Looma baahna.

**9. Saxixa.** Si aad isaga diiwaan gelisid Wisconsin waa:

- in aad ahaatid muwaadin Mareykan ah
- daggan tahay Wisconsin iyo in aad dagganeed cinwaanka diiwaan gelinta ugu yaraan muddo 10 maalin.
- jirtid ugu yaraan 18 sanno
- aan laguugu xakumin khayaano qaran, dambi culus ama laaluush bixin, ama haddii ay sidaas jirto, in laguu soo celiyay xuquuqdaada madaniga kaddib marka aad dhamaysatay ciqaabta lagu siiyay aam in caffis lagu siiyay
- aysan jirin maxkamad kugu tilmaantay in aad tahay qof itaal darran xagga fahamka ujeedadada hawsha doorashada
- in aadan gelin ama ka fa'iidin sharad ama aadan geysanin taasoo ku xeran hadba natijjada ka soo baxda doorashada
- waa in uusan codkiisa ka dhiibin goob kale isla doorashada.

## West Virginia

La casriyeyay: 09-12-2006

Taariikhda Ugu Dambeeyso Diiwaan  
Gelinta - 21 maalin doorashada ka hor.

**6. Nambarka Aqoonsiga (ID).** Geli nambarkaada shattiga wadaha. Haddii aadan haysanin nambarka shattiga baabuurka lagu wado, geli

# Tilmaamaha Gobolka

---

## Cinwaanka lagu soo diro warqadaha:

Waxaad foomka diiwaan gelinta oo dhamaystiran iyo koobiga warqadaha caddeynta meesha aad daggan tahay u dirtaa xafiiska karaaniga dawladda hoose. Waxaad karaaniga dhawladda hoose ka heli kartaa halkaan:

[https://myvote.wi.gov/en-US/  
MyMunicipalClerk](https://myvote.wi.gov/en-US/MyMunicipalClerk)

Haddii aadan heli karin cinwaanka karaaniga dawladda hoose, waxaad u diri kartaa:

Guddiga Doorashooyinka  
Wisconsin (Wisconsin Elections  
Commission)  
212 East Washington Avenue,  
Third Floor  
P.O. Box 7984  
Madison, WI 53707-7984

[Xasuusin: arjiyada waxaa loo soo celi karaa xafiiska Guddiga Doorashooyinka Wisconsin (Wisconsin Elections Commission), cinwaanka kore, balse si leysaga ilaaliyo dib u dhac suurtogal ah, waxaa laguula tallina in aad soo celisid cod bixintaada oo dhamaystiran arjigaada diiwaan gelinta oo dhamaystiran toos ugu soo celisid xafiiska karaaniga dawladda hoose.]

## Wyoming

La casriyeyay: 03-01-2006

Sharci ahaan Wyoming ma ogolaan karto foomkaan ilaa laga baddalo sharciga gobolka.

## **Tilmaamaha Gobolka**

---

Culeyska warbixinta dadweynaha ka saaran aruurintaan macluumaadka, OMB Control No. 3265-0015, waxaa lagu qiyaasay in ay qaadato 7 daqiiqo halkii jawaab, marka leysku celceliyo, kana mid ah waqtiga ku baxa dib u fiirinta tilmaamaha, raadinta ilaha xogta iminka jirta, aruurinta iyo xajinta xogta loo baahan yahay, iyo dhamaystirka iyo dib u fiirinta macluumaadka la aruuriyay. Wuxaad faalada la xariirta qiyaasta waqtigaan ama wijiyyada kale ay aruurintaan macluumaadka leedahay, kana mid ah talooinka lagu yareeyo waqtiga, u dirtaa U.S. Election Assistance Commission, 633 3rd Street NW, Suite 200, Washington, DC 20001, Attn: National Mail Voter Registration Form. Dadka ka soo jawaaba waa in ay la socdaan in marka laga reebo qodobada kale sharciga, ma jiro qof lagu ciqaabi karo in uu ku fashalay in uu u hoggaansamo aruurinta macluumaadka haddii aan la soo bandhigin nambarka kantarooka OMB oo shaqeeyo.